**SHARCI 22 NOFEMBER 1970 L.77**

**XEERKA MACDANTA**

**Qod. 1**

Xeerka Macdanta, ee lifaaqa A ee sharcigaan, waa la ansaxiyey wuxuuna noqonaa qayb ka mid ah sharcigan.

**Qod. 2**

Sharcigan waxaa lagu daraa soo uruurinta rasmiga ah ee sharicyada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saaraa faafinta Rasmiga.

Wuxuu dhaqan galaa maalinta xigta ee lasoo saaro faafinta Rasmiga.

Dadka oo dhan waxay ku qasbanyihiin inay dhowraan, dadka kalena faraan inay u hogaansamaan inuu ka mid yahay sharuucda Jamhuuriyadda.

**XEERKA MACDANTA**
Lifaaqa A

**CINWAANKA 1AAD**
Xeer guud

**Qod. 1**
**Qeexid**

Xeerkaan, haddii aanan si kale loo tilmaamin nuxur ahaan:

- Hog ama ‘gallery’- waxaa loola jeedaa waddo qodan ama “tunnel” dhisan oo hoos u janjeera 15 darajo, oo loo isticmaali karo gelid, dareerin ama hawosiin ku saabsan waxqabad guud, beerid ama soo saarid macdan.
- Dhul Ceegaag – waxyaabaha ceegaaga ee daadka keena- waxaa loola jeedaa dhammaan macdanta ceegaagta ee leh xaalad burbursan ee madooyin dusha sare iska heysan;
- Awoodda Garsoorka- waxaa loola jeedaa maxkamadda Gobolka ee awoodda u leh deegaan ahaan;
- Maamule - waxaa loola jeedaa maamulaha baarista macdanta;
- Fasax - waxaa loola jeedaa qofka haysta fasaxa qodista macadanta lagu bixiyey, si waafaqsan qodobbada xeerkan ee kamid yihiin dhammaan dadka leh xuquuq ama maslaxda ku heysto fasaxa ku yimid tanasul ama sababa kale;
- Wakiil macdanta u fasaxan – waxaa loola jeedaa qof haysto warqadda fasaxa ganacsiga macdanta sida uu qabo qod. 58 ee xeerkan;
- Xididka – waxaa loola jeedaa dhammaan macdanta ee ku timaadda qaab ah sida tusaale xidid, qeybo xididmacdaneystay, keydka ku baahsan ama dhuljiifka ah.
- God Macdan – Waxaa loola jeedaa goob kasta, goob ama kaawo halka lagu fuliyo hawsha macdanta.
- Abuurid - waxaa loola jeedaa socodsiinta si ujeedo leh kala soo bixidda, ka faa’ideysiga iyo ka soo saaridda macdanta, waxayna ka koobantahay howlgal kasta ee lagama maarmaan u ah ujeeddadaas.

- Macdan – haddaan si kale loo qeexin, waxaa loola jeedaa dhammaan maadooyinka macdanta dabiiciga ee lala soo bixi karo, ay ka mid yihiin macdanta saliidda, keydadka ee asal ahaan ah (Pateritia), macdanta biraha qaaliga ah, biraha-saldhigga iyo (ferrosi), keydadka daadadka iyo macdanta loo isticmaalay shaqo kasta oo warshadeed ama beero.
- Saliid – waxaa loola jeedaa saliidda iyo wixii la xiriira (idrocarburi), metano ee ku sugan xaalad dabiici ah ee dhulka ceegaaga, (l'asfalto, il bitume ee leh nuxur bituniinose), waxaa ka baxsan karboonka, (gli scisti bitununosi) ee haraadiga lakabyada ah ee suurtagal tahay in saliid shidaal lagagala soo baxo qaab dhalaalin ah ee qaybisa.
- Xuquuq macdan - waxaa loola jeedaa xuquuqda waxqabadka howlaha macdanta ee ku xusan xeerkan iyo xeer hoosaadka fulinta;
- Waddo gudbin - waxaa loola jeedaa waddo kasta, jid, toobiye wadiiqo, ku dhaqan marid, isku xirid ama iska talaalid marinka tariinka, tram-ka, telegraaf, gaadiid leh suun, xarig adag, leyn koronto iyo telefon, taraarax ama dhuun qashirka saarta, tuubo galin, dereerin, dariiq-dhismo, ceel, kaabad, buundo, waddo biyo dabiici ah ama artifishaal;
- Qof - waxaa loola jeedaa bulsho kasta ururo biiray urur ama hay'ad leh ama lahayn shaqsiyad qaanuuni.
- Kaawo - waxay la micno tahay ceel.
- Sarkaal boolis - wxaa loola jeedaa sarkaal ciidanka booliska ee darajo ahaan ka yareyn xarigle ama darajo la mid ah.
- Xuquuq sahan – waxaa loola jeedaa xuquuqda baarista ee ku xusan xeerka iyo xeer hoosaadka fulintiisa.
- Xidid - wuxuu la micna yahay dun, liilin.
- Xeer hoosaad – waxaa loola jeedaa qodobbada xeereeya fulinta xeerkan.
- Bedka dhulka la kireystay - waxaa loola jeedaa goob dhuleedka la xiriira ruqsadda macdanta, ku howlan tallaalid, rakibaad iwm, oo ay waajib thaay kiro gaar ah sida uu qabo Qod. 47.
- Xog haye **-**waxaa loola jeedaa xoghayaha Dowladda ee khayraadka macdanta;
- Ceel - Waxaa loola jeedaa kaawo kasta iyo qodaal kasta oo si toosan ama janjeera, marka laga reebo qodaallada soo gelidda, qodobbada isgaarsiinta ama soo gelidda ee ah ama noqon karo in waddo loo isticmaalo, gaadiid, dareerin ama babbin, dabeel.
- Haraadi - waxaa loola jeedaa dhammaan dhagxaanta, quruuuraxda, ciidda, dhoobada ama maadooyin haraadi ah ee ka falgala kala saaridda;
- Waddo biyo - waxaa loola jeedaa dhuun ama tubo kasta, dabiici ah ama macmal ee xadeynaaya, koobaaya, socodsiinaaya ee ilaalinaayo habsocodka biyaha, si joogta ah ama waqtiyo.

**Qod. 2**
**Ka tirsanaanta iyo ilaalinta macdanta**

Dhammaan macdanta jirta:

a) Meel kasta ee dhulka Jamhuuriyadda.
b) Dhul badeedka ka hoos, sida ku cad Xeerka badaha,[1]
c) Sare ama hoos u qoto dheer badda ee ka baxsan dhulbiyoodka ilaa meesha ugu qoto dheer gaareyso 200 mitir, inta aan ka ahayn qoto ka weyn biyaha la xiriira ay suurgal tahay ka faa'ideyn, waa hantida dowladda ee ku leedahay awood ilaalo.

[1] Eeg sharci 37 Dic, 1972 – Sharciga dhulbadeedka Soomaali.

**Qod. 3**
**Wakaalad awoodsiin**

1) Xoghayaha wuxuu awood u leeyahay inuu kuwakiishto, Dekereeto uu soo saaro, Maamulaha sida uu qabo Xeerkan ama Xeer-hoosaadka.
2) Maamuluhu wuxuu amri karaa, kaddib markuu ka helo oggolaasho qoraal ah xoghayaha, sarkaal kasta ee dowladeed inuu isticmaalo dhammaan awoodaha iyo howlaha u xilsaaran maamulaha sharigan iyo xeer-hoosaadka.

**Qod. 4**
**Ka cafin mas'uuliyadda**

Dacwo sharci, madani ama ciqaab, ee lagu qaadi karo maamulaha ama sarkaal kasta ee idman falal uu si niyadsame ah u sameeyey ee shaqadooda la xiriirta (33 C.P; 164 cc.) sida xeerkan iyo xeer-hoosaadku ay qabaan.

**Qod. 5**
**Awood ka saarid meelaha qaar baarista iyo abuuridda macdanta**

1) Xoghayaha wuu awoodaa, kadib ogoolaashaha Golaha xog-hayayaasha, inuu dekereeto soo saaro ee lagu baafiyey faafinta Rasmiga, caddeeyo goob kasta u xiran baarista iyo abuuridda macdanta;
    a) La xiriirta macdanta oo dhan ama qaar kooban ee macdanta.
    b) Muddo kooban ama ilaa digniin cusub
    c) Ku saabsan dhammaan ama koox gaar ah ee shaqsiyaad.

Tan kale, ka reebiddaas wax uma dhimayso xuquuqdii hore ee jirtay ee beerista iyo abuurista macdanta ee goobtaas.

2) Xoghayuhu wuu awoodaa, isagoo oggolaasho ka haysto Golaha Xog-hayayaasha, dekereeto kale, dib ugu furi kara goobtaas ama qeyb ka mid ah ee la xiriirta baarista ama abuurista macdanta, muddada iyo shuruudaha ay la tahay kuwo habboon.

**Qod. 6**
**Meelaha ka reeban indha-indheyn, baaris ama abuurid**

1) Marka laga reebo xeer ka duwan ee ku jira sharcigan, ruqsadkasta, fasax ama oggolaasho ma u fasaxi karto, cidduu doono ha ahaado, indha-indheyn, baaris ama abuuris macdanin uuku sameeyo:
    a) Meelaha qubuuraha, ama u dhow ama wareega masjidyada, kaniisada iyo dhismooyin kale ee lagu cibaadeysto;
    b) Dhulalka u gaarka ah danta guud (oo aan laheyn ujeeddo abuurid macdan) ee ku sugan bed dhan 100 yaardi ee dhulkaas;
    c) Meelaha ku sugan xadka bedka xarun dhexe, magaalo, tuulo ama meel la degganyahay;
    d) Dhulka u gaar ah tareennada, telefoonnada, leenka korontada, telefoonnada ama telegraafka, marka laga reebo kuwo milkiilaha ooku dhisan goobta ruqsada, fasaxa ama ruqsad macdan;
    e) Meelaha ay ka muuqdaan, ama dhulalka ku sugan bedka ilaa 100 yaardi ee warshado, dhismooyin, tubbogelin, dhuun mareenno biyo, faro, kaabad ama waro biyaha kaydiya ay dowladda leedahay, maamulka deegaanka ama hay'ad madaxbannaan;

f) Jidadka, waddooyinka, toobiyayaasha ama dhulalka bedkoodu yahay 50 yaardi ee diilinta qaybisa jidadka, waddooyinka ama toobyeyaasha marka laga reebo kuwo lagu dhistay ruqsadda oggolaasho ama fasax macdan qodis;
g) Kaydka ugaarsiga ama kaydka kaymaha;
h) Dhulalka dowladda u gaar ah ee soo saarista macdanta, sida uu qabo qodobka 8 ee xeerkan, dhulkaas oo naqshad jaangoyn ay tahay in gacanta laga saaro maaulaha;
i) Dhulalaka bedkooda yahay 100 yaardi ee qaab kasta gidaarkiisa yahay mid joogto ah, marka laga reebo oggolaasho milkiilaha, iyo dhul beereedka mudda u dhaxeysa abuurista iyo gurashada, marka laga reebo oggolaashaha milkiilaha, si kasta ha ahaate, marka oggolaashahaas la diido cudur daar la'aan, maamuluhu wuxuu amri karaa hawlaha baarista iyo abuurista macdanta ee goobahaas inta ku siman xuduud ah iyo shuruudaha uu u arko kuwo ku habboon;
j) Dhulalka bedkoodu yahay 100 yaardi ee Ceel kasta, waro xoolaha ka cabbaan iyo ilo kale ee biyo la isticmaalo, marka laga reebo oggolaashaha milkiilaha ee ishaas ama maamulka deegaanka ama hay'adaha madaxa bannaan ee leh ilaalinta iyo kormeerka tan kale, marka la diido oggolaashahaas sabab la'aan, maamuluhu wuxuu amri karaa in la sii wado hawlaha sahminta, baarista iyo abuurista macdanta ee dhulkaas inta ku siman iyo shuruudaha uu u arko kuwo munaasab ah;
k) Dhul bedkiisu yahay 100 yaardi ee xaddiga aereodromo- kasta ama goobta degitaanka diyaaradaha ( Aereodromo) Marka laga reebo midka u dhisay milkiilaha inta ku siman ruqsadiisa, fasaxiisa ama oggolaasho macdan qodis;
l) Dhul bedkiisu yahay 100 yaardi ee meel kasta ee qodis biyo raadin, macdan ama waxqabad sahan, marka laga reebo oggolaashaha qofka watay howlahaas qodista;
m) Dhul loo oggolaaday fasax, ruqsad ama ruqsad macdan ka duwan saliidda (inta aan ka ahayn midka milkiilaha) iyo dhulka ujeedkiisu yahay codsi lagu doonaayo ruqsaddaas, fasaxaas ama ruqsad macdan, si kastaba, xog-hayuhu wuu u oggolaan karaa codsadaha inuu bilaabo howlaha baarista ama abuurista macdanta ee dhulkaas la soo sheegay shardi ahaan inuu u arko mid ku habboon, inta uu filaayo in ruqsada la oggolaan doono, fasaxa ama ruqsada macdanta;
n) Dhulka ay calaamadeeyeen sarkaallo dowladeed sida ay qabto faqradda labaad ee qodobka 94;
o) Dhulka ay ku suganyihiin keydad haraadiga ka dhashay hawlgallada ka dhashay hawlgallada macdan abuurista ee hakaday.

2) Iyadoo sidiisi yahay xeerarka faqrada hore, xog-hayuhu wuu awoodaa, marka laga reebo arrinta ku xusan xarafka a) ee kor ku xusan iyo la xiriirinta oggolaashaha xog-hayaha Dowladda ee awoodda u leh, siiyo ruqsad gaar ah ee baaris iyo abuurid macdan goobahaas la soo sheegay, waqtiga iyo shuruudaha ay la tahay munaasib.

## Qod. 7
## Dhulka uxaddidan dan guud awgeed

1) Marka dhulku uu yahay mid ka sameysan dhammaan ama qeyb ka mid ah dhulka ruqsada, fasaxa ama oggolaasho fasax macdan qodis, ee danta guud loogu baahday (681/3, xm) xog-hayuhu, isagoo ka haysto meelmarin golaha xoghayayaasha, wuxuu wargelinayaa milkiilaha u leh xuquuqda baarista iyo abuurista macdanta.
2) Dhamaan xuquuqda baarista iyo abuurista macdanta ee la xiriira dhulka la soo sheegay waxaa loo qaadanaa inay joogsadeen taariikhda ku qoran gaarsiinta, milkiiluhuna waa inuu ka tagaa dhulkaas ka

hor taariikhda ku xusan gaarsiinta qaab dhismeed kasta, goob dhismo rakibaadyada ama qalab kale ee milkiyadiisa.

3) Haystaha xuquuqda baarista abuurista macdanta, ee helay ogeysiinta ee qodobkan, kuma qasbana inuu keeno wanaajin masaaxadda dhulkaas, wuxuuna xaq u leeyahay inuu weydisto magdhow carqalin kasta jid mariinnada, waxqabad, dhismooyin, rakibaadyada iyo nacfi kasta ee milkiyadiisa, ee ma aha carqalin ku dhaqanka xuquuqdiisa baarista ama abuurista macdanta.

   Tan kale, xaq uma laha magdhow ka duminta goobta la degay ama dhismooyin kale oo ka taagan si ku meel gaar ah ee la xiriira hawgalka sahanka ama sahminta;

4) Qaddarka magdhowga uu mudan yahay, sida uu qabo qodobkan, haddii aysan dhinacyada ka heshiinin, waxaa xadidaaya hay'adda Garsoorka.

## Qod. 8
## Xaqa dowladda inay la wareegto macdanta dan guud awgeed

Ma jiro xeer ku xusan sharcigan ama xeer hoosaadka fulinta oo uu xaddidi karo xuquuqda dowladda inay la wareegto sababo dan guud macdanta laga soo saaro dhul kasta.
Midda kale, marka ay dowladda ay gacanta ku dhigto macdanta la soo sheegay dhulka leh ruqsad, fasax ama baaris macdan, si ay u soo dhexgasho xuquuqdeeda baarista iyo abuurista macdanta, dowladdu waa in ay siisaa haystaha magdhow u qalmo carqaladeynta ama qasaaro loo gaystay, qaddirka lagu heshiiyey ama la xaddiday sida ay qabaan faqrada saddexaad iyo afaraad ee Qod. 7.

## Qod. 9
## Ka noqoshada ruqsada, fasaxa ama oggolaasho macdan qodis marka qiyaano jirto iwm

1) Sida waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeer-hoosaadka waxqabadka, kuwa la siiyay ruqsada sahminta, fasaxyada baarista ama oggolaashaha macdan qodis ee kadib caddaato in ruqsadaha lagu helay caddeymo la xiriira beenabuur ama qiyaano ama warbixinno aan sugneyn, xoghayuhu wuxuu ugu yeeri karaa, qaababka sharci ee degsan, milkiilaha inuu keeno muddo xaddidan gudaheeda cudurdaarrada wax ku oolka ah, si uu u hakiyo kala noqoshada ruqsada, fasaxa ama ruqsada macdan qodista.
2) Marka haystaha uusan adeecin u yeeristaas muddada loo qabtay, ama cudurdaarrada uu keenay u muuqan kuwo ku filaneyn, xoghayuhu wuxuu awoodaa, kadib oggolaashaha Golaha xoghayeyaasha, in uu la noqdo ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha macdan qodista.
3) Go'aanka la noqoshada waxaa lagu qoraa faafinta Rasmiga, nuqul ka mid ahna waxaa loo diraa milkiilaha cinwaankiisaugu dambeeyey.

## Qod. 10
## Ruqsad kala noqosho, fasax ama ruqsad qodis macdan
## Sabab jebin xeerkan iyo xeer hoosaadka iwn

1) Haddii ay dhacdo faragelin qodobbada xeerkan ama xeer-hoosaadka fulinta ama faragelin muddada iyo shuruudaha ee ruqsada sahanka, fasaxyada baarista ama oggolaanshaha qodis macdan dhinaca milkiilaha, xog-hayuhu wuxuu u diri karaa, si waafaqsan xeerka in uu keeno muddo cayiman cudurdarrada lagama maarmaanka ah si looga hortago kala noqoshada ruqsada qodista, fasaxa ama oggolaashaha.
2) Ogeysiinta la soo sheegay waxaa loo diraa heystaha cinwaankiisi ugu dambeeyey, haddii haystuhu uusan u hoggaansamin u yeeristaas muddada loo qabtay ama cudurdaaradiisa u muuqdaan kuwo

aan ku filnayn, xoghayuhu wuxuu awoodaa, kadib oggolaashaha Golaha xog-hayeyaasha, in dekereetadiisa ku qoro faafinta Rasmiga, nuqul la mid ahna loo diro haystaha cinwaankiisi ugu dambeeyey, kala noqdo habraac kooban ruqsada, fasaxa ama ruqsada qodis macdan.

3) Saameynta la xiriirta kala noqoshadaas dhammaan mudnaanta iyo xuquuqda ee lagu siiyey ruqsada, fasaxa ama ruqsada qodis macdan way dhacayaan laga bilaabo taariikhda ku xusan dekereetada.
4) Ka noqoshada, sida uu qabo qodobkaan iyo qodobka 9, kama reebayaan marnaba qof masuuliyadiisa faragelintaas la soosheegay ee hore loo galay ka hor kala noqoshada, mana bannaana fal kasta ee horjoogsanaaya qaababka sharci ee iyaga la xiriira.

**Qod. 11**
**Mamnuucid dadka qaarkiis inay yeeshtaan xuquuq**

1) Waxaa laga mamnuucay xubnaha dowladda, shaqaalaha guud iyo cid kasta u xilsaaran fulinta xeerkan ama xeer-hoosaadka, inuu gato si toos ah ama dadban, shaqsi ahaan ama qof kale ama xuquuq ku leh ama dano ka yimid xuquuq baaris ama abuuris macdan ruqsadda, fasaxa, oggolaashaha, dokumentiga ama heshiiska ee keenaayo dhalashada xuquuq noocaas ah ama dan, waa wax kama jiraan mana laha wax saameyn ah.
2) Waa mamnuuc cid kasta iibsashada lagu soo dugaalo wareejin ama wakiil, xuquuqda baarista ama abuurista macdanta ee sida uu qabo xeerkan ama xeer-hoosaadka, tahay mamnuuc inuu ku yeeshto magaciisa.

**CINWAANKA 2AAD**
Xuquuqda iyo Waajibaadka milkiilaha xuqquda baarista iyo abuurista macdanta

**Qaybta 1aad**
Xuquuq guud

**Qod. 12**
**Xuquuq gelitaan, helitaan awood isticmaal iwm**

1) Iyadoo la tixraacaayo qodobbada xeerkan iyo xeer-hoosaadka fulinta iyo marka laga reebo kuwa si cad loogu qeexay ee ka soo horjeeda shuruudaha ruqsada, fasaxa ama oggolaasho macdan qodis inta ka aheyn kuwa lala xiriirinayo qodob kale oo sharci ee reebaayo, maamulayo ama xaddidaayo gelidda goob kasta ee dhulka Jamhuuriyadda, milkiilaha xuquuq baaris ama abuuris macdan waa awoodda, inta ku siman ruqsadda, fasaxa ama ogolaashaha macdan qodista;
   a) Gelid iyo sameyn baaris dhulka ama biyaha (oo, sida uu qabo qodobka 6aad, aan laga reebin baarista iyo abuurista macdanta) macdana ee leh ruqsada, fasaxa ama oggolaasho macdan qodis;
   b) Howgalka intuu socdo si niyosami ah baarista iyo abuurista macdan inta ku siman goobtaas la soo sheegay;
      1) Ka taago dhulka cidna qabsan xero ku meel gaar ah iyo qaabdhismeydka ama waxqabad ku meel gaar eelagama maarmaan ah waxqabadka la soo sheegay, iyo inuu qabsado si ku meel gaar ah;
      2) Uruuriyo alwaax la shito, marka laga reebo alwaaxa taagan, leh isticmaal guri iyo kuwa raacsan, matilaayo ama ku dhaqan leh
      3) La daajiyo xoolaha ee lagama maarmaanka u ah fulinta howlaha baarista iyo abuurista macdanta.

c) La socodsiiyo qodista ceelal iyo faro, lana sameeyo daloolin ama qodis. Tan kale, ma soo leexin karo biyo webi ama biyo kale socda, ma ka soo saari karo biyo harooyinka, balliyada iyo ilo kale fasax qoraal la'aan ee hay'adda awoodda u leh kormeerka ama milkiilaha biyahaas.
Sidoo kale ka faa'ideysiga biayaha iyo dhismaha waxqabad cusub ee la xiriira uruurinta, ka soo saarista iyo isticmaalka biyo waxay hoostagaan xeerarka nidaamka biyaha ee haatan jira2
d) La qaato tirada dadka iyo in la isticmaalo hababka gaadid ee lagama maarmaanka u ah wax qabadkaas.

**Qod. 13**
**Mideynta ruqsada, fasaxa iwm**

1) Milkiilaha ruqsada sahminta, fasaxa baarista ama oggolaasho macdan qodis dhul isu dhow ee isku noqonaayo hal bloog, wuu codsan karaa maamulaha, sida uu sharciga qabo mideynta ruqsadaas, fasaxyada ama oggolaashaha.
Tan kale, mideynta la soo sheegay laguma dabaqaayo ruqsada, fasaxyada iyo oggolaashiyaha leh dabeecad kala duwan iyo haystayaal kala duwan dhexdooda.
2) Dhammaan waajibaadka ka dhasha xeerkan iyo xeer-hoosaadka wax qabadka dhammaan fasaxyada, ruqsadaha ama oggolaashaha ee sidaas lagu mideeyey, sidaasi darteed waxay noqon karaan, hadba siduu rabo haystaha, kuwo la fuliyey marka loo eego mid ama ka badan fasaxyada ruqsadaha ama oggolaashaha.
3) Qoraallada warbixinnada iyo qorshayaasha hawlgallada wadajirka bloogga ayaa la wada gudbiyaa.

**Qod. 14**
**Ka saarid dhismooyin iwm, dhammaadka ruqsada, fasaxa ama fasaxa macdan qodis**

1) Haystaha ruqsadda sahminta fasaxyada baarista ama abuurista macdanno wuxuu awooda, 90 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda dhicitaanka ama muddada waqti dheeraad ah oooggolaaday xog-hayaha, in uu halkaas saaro dhismaha, makiinadaha, motoorrada ama qalabka yaalla goobahaas ama jidadka la maro ee loogu dhaqmay habka la xiriira fasaxyadaas, ruqadhaa ama oggolaasho macdan qodis, laakiinma ka saari karo midna jaranjaro alwaax ee macdan qodis, hogagga buuraha ama ceelasha, marka laga saaro oggolaashaha maamulaha, si waafaqsan xeerarka xarafka b) ee qodobka 23.
2) Haddii ay dhismooyinka la soo sheegay, makiinadaha ama qalabyada aan laga saarin sida kor lagu soo tilmaamay, xoghayuhu wuu amri karaa in lagu iibiyo heshiis gaar ah ama naado; waxa laga helo beecaas, xaasilka kharajyada beeca iyo kharajyada kale ee milkiilaha la soo sheegay ahayd, sharci ahaan, inuu siiyo dowladda, waxaa reebanaaya xog-hayaha ilaa iyo inta milkiiluhu uu kasameyndoono codsi muddo laba iyo toban bilood gudahooda, hadday dhamaato, wixii laga helay waxaa la wareegaya dowladda. Tan kale, haddii ay dhismooynka la soo sheegay, makiinadaha, matoorada ama qalabyada laguma iibin karo heshiis gaar ah ama naado, waxay noqonayaan milkiyadda dowladda oo u isticmaali karta qaabka uu amro xoghayaha.

**Qod. 15**
**Xuquuq mariin**

[2] Eeg, shari L. 13 ee 1st Agasto, 1966

1) Haddii haystaha xuquuq baaris ama abuuris macdan doonaayo inuu helo xuquuq mariddhul ku yaalla meel ka baxsan dhulka ku xusan ruqsadiisa, fasaxiisa ama oggolaasho macdan qodis, wuxuu awoodaa, sida sharciga qeexaayo, waa inuu weydiisto xoghayaha oggolaashaha xuquuqda mariinka.
2) Haddii, Codsiga uu u soo gudbiyey siwaafaqsan farqada hore, xoghayuhu uu ku qanco:
    a) In hawlgalka baarista iyo qodista ama gaadiidka, xanaaneynta ka shaqeynta iyo ilaalinta macdanta la soo saaray tahay lagama maarmaan in codsadaha leeyahay xaqa mariinka.
    b) Inay tahay macquul in la oggolaado dhulkaas si gaar ahaaneed, ee ku saleysan ujeeddada codsiga, xaqa mariinka ee muddada codsiga ama, oggolaashaha codsadaha, beddeli karo xoghayaha; kani waa, sida sharciga tilmaamayo, oggolaado xaqa mariinka.

**Qod. 16**
**Muddada xaqa mariinka**

Xaq kasta ee mariin, lagu yeeshtay sida uu qabo qodobka la soo sheegay, wuxuu dhamaanayaa ruqsada markey dhacdo, fasaxa ama oggolaashaha la soo sheegay iyo in heystuhu ku dhaqmo xeerarka qodobbada 14 iyo 23.

**Qaybta 2aad**
Waajibaadka guud

**Qod. 17**
**Muhiimadda jooloojiyada**

1) Halka ay u muuqato laga maarmaan, xoghayuhu wuu awoodaa, intuusan bixin ka hor ruqsad, fasax, ogollaasho macdan qodis ama xaq mariin, inuucodsado in la siiyo ahmiyad jooloojiyad oogada sare ee dhulka ee la rabo in la owdo ama la dego ama xuduudaheeda la sahmiyo, tilmaamaheedana ansixiyo xog-hayaha. Kharajka sahminta waxay dulsaarantahay codsadaha ama milkiilaha, hadba sida arrintu tahay.
2) Xoghayuhu wuu weydiin karaa in xuduudaha dhammaan ama qeyb ka mid ah goobta ruqsada, fasaxa ama oggolaasho qodis macdan in la xadeeyo sida loogu ansaxiyey, ay ku jiraan kuwa laga reebay nooc kasta ee dhir hareeraha xuduudahaas, si looga dhiga kuwo si cad loo arki karo, haystaha waa inuu xaqiijiyaa dhammaan ama qeyb ka mid ah xuduudaas si joogta ah loo xadeeyey sida kor ku xusan.

**Qod. 18**
**Waajibaadka, haystaha waa inuu keeno ruqsad, fasax iwm**

Haystaha ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha qodis macdan waa inuu tusiyaa, mar allaale markii la weydiiyo, qof kasta ee dan xaq ah ka leh dhulkaas lagu sameynaayo waxqabad baaris iyo ka faa’ideysi, ee sarkaal boolis, guddoomiye degmo, maamule ama sarkaal iyaga amar ka haysto.

## Qod. 19
## Gaarsiinta waxqabad macdan iyo debaaji magdhow

Milkiilaha xuquuqda baaris ama abuuris macdan ee doonaayo inuu qabto hawlo baaris ama abuuris waa inuu, marka suuragal tahay in la sameeyo, gaarsiiyo qofka dan xaqa ah ku leh dhulkaas inta aan la bilaabin hawlaha iyo haddii qofkaas la weydiisto ama xoghaynta weydiisato, waa inuu ku kaydiyaa xoghaynta taxadir ahaan qiimaha ama debaajiga uu weydiisto xog-hayaha si ay u daboosho wixii khasaare la magdhabi karo, siduu qabo qod.20 Debaajigaas ama wixii soo hara dib baa loogu celin karaa siduu qabo qod. 21 faqraddiisa shanaad.

## Qod. 20
## Magdhow

1) Haystaha Xuquuq baaris ama abuuris macdan waa inuu, markii codsi ka yimid qof kastoo dan sharci ah ka leh dhulkaas uu isaga ka wado waxqabad baaris ama abuuris, siiyo magdhow macquul ah oo u dhigmo dhib kasta ee xuquuqdiisa dhulka ku timaado iyo khasaaraha loo geystay dhulka (684xm), xoolaha, abuurka, geedaha, dhismooyinka ama howlaha dhismo, ee la dhasha waxqabadka la soo sheegay.
2) Qiimaha magdhowga ee sugnaaday, sida ku cad faqrada la soo sheegay, waxaa ka heshiinaya dhinacyada, haddii ay dhinacyadu gaari waayaan heshiis ama milkiilaha uusan gudan waajibkiisa inuu bixiyo qiimaha lagu heshiiyey, dhinaca xaqa u leh danta dhulkaas wuu isku dayi karaa inuu dacwad ka furto garsoorka hortiisa.
3) Milkiilaha waa inuu siiyaa qofka u leh lacagta ay goysay hay'adda Garsoorka 14 maalmood gudahooda taariikhda xukunka la soo gaarsiiyey.
4) Haddii lacagta ay goysay hay'adda Garsoorka la bixin waayo sida uu qabo qodobka kor lagu soo sheegay dhinaca masuulka uu bixiyo dibaaji, sida uu qabo qod. 21, xoghayuhu wuu awoodaa, haddii laga codsado, in uuamro in lacagta la sheegay laga gooyo dibaajiga. Haddii aan la soo dhigin dibaaji, xukunka wuxuu noqonayaa mid la fuliyo, sida sharciga qabo (338 iyo qodobbada la xiriira ee x.c.m.).
5) Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay inuu joojiyo, isagoo gaarsiinaayo warka daneeyaha, xuquuqda baarista iyo abuurista ee haystaha ee aan bixin magdhowga ku waajibay, ilaa iyo inta uusan fulin waajibkaas ee dhigay dibaaji xoghayaha agtiisa dibaaji kale ee uu weydiisan karo dammaanad magdhow la filan karo ee ku waajibtay.
6) Halka bixinta mag-dhowga ama dhigaalka dibaajiga lama sameyn karo muddada uu xog-hayaha u arkin macquul, xoghayuhu wuxuu awoodaa ka noqosho xuquuqda baarista iyo abuurista ee haystaha , wax qaban waayey, iyadoo aan wax loo dhimeyn isku dayga falkale oo sharci ah ee la xiriirta fulin la'aanta.

## Qod. 21
## Dhigaal dibaaji

1) Iyadoo la raacaayo habka fulinta waajibaadka uu faraayo xeerkan iyo xeernidaamiyahaa wax qabadka, xoghayuhu wuxuu dalbi karaa, qof kasta ee weydiisto ee leh xuquuqda baarista ama abuurista macdan, inuu keydiyo, marka laga reebo lacagaha ku xusan qodobbada 19 iyo 20, dibaaji lacag ah ama badelkeeda dibaaji kale ee la qiimo ah, sida hadba ay qoreen qodobbada, haddii la waayo kuwaas, sida ay la tahay oo macquul ah.
2) Marka ay dhigaalka dibaajiga la soo sheegay aan la fulin muddada loo xaddiday, xog-hayaha dib buu u celin karaa codsiga ama wuu ka noqon xuquuqda baarista ama abuurista macdanta.

3) Haddii uu dhigaal bixiyaha uusan fulin, waqtiga loo sheegay gudahiisa, waajibaadka uu saaray xeerkan ama xeer-nidaamiyaha waxqabadka, xoghayuhu wuu isticmaali karaa tallaabooyinka uu is leeyahay lagama maarmaan ee la xiriirta waajibaadkaas, wuuna ka jari karaa dhigaalka dibaajiga qiimaha uu is leeyahay macquul ee dabooli kara kharajyada ee la galay ujeedaddaas awgeed.
4) Marka dibaajiga la bixiyey la xiriiro sababaha kharajyada kor ku xusan dhammaan ama qayb ka mid ah, xoghayuhu wuxuu awooda inuu weydiiyo dhigal bixiyaha cawilcelin lacagaha la jaray dibaajiga. Haddii la fulin waayo codsiga la soo sheegay, xoghayuhu wuu ka noqon karaa xuquuqda baarista ama abuurista macdan ee loo bixiyey dhigaalka dibaajiga.
5) Marka ay dhammaato maslaxad kasta ee xuquuqda baarista ama abuurista macdanta ee loo sameeyey dhigaalka curaarta, ruqsada rasmiga ah, fasaxa ama oggolaashaha waxaa loo geynaa xoghayaha waana la diiwaangelinayaa muddada ay dhammaanayso maslaxadaas, qofka bixiyey dhigaalka curaarta wuxuu u geyn karaaa xoghayaha codsi qoraal ah ee cawilcelin ama loo celiyo curaarta ama inta ka soo hartay, xoghayaha wuxuu amraa cawilcelintaas ama celinta marka la keeno caddeymo u qalmo. Tan kale, Cawil Celinta iyo u celinta waa in la sameeyaa iyada oowax u dhimeynin soo ceshasada ama tallaabooyin sharci ee socday ama noqon karo kuwo bilowday kadib xadgudub qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyaha uu sameeyey milkiilaha xuquuqdaas ama wakiilladiisa ama shaqaalahiisa, haddii kale soo ceshada hore u billaabatay ama noqon karo kuwo billawday sababo kale awgood.
6) Marka laga reebo sida ku xusan qodobka 29, halka danaha dhigaalaha ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha ay dhammaadaan sabab wareejintaas darted (35, 42), cawil celinta ama celinta dibaajiga waxay dhacayaan marka dhigaalka uu sameeyo qofka ruqsada haysto dibaaji qiimo lacag lamid ah amaka duwan, uu xoghayaha xaddiday.

## Qod. 22
## Jariiddada waxqabadkabaarista iyo abuurista macdanta

1) Milkiilaha xuquuqda baarista ama abuurista waxaa ku waajib ah inuu haysto, inta ku siman dhulka ruqsada, fasaxa, oggolaashaha ama goobo kale eeansaxiyey maamulaha, waliba qorshe iyo khariidada waxqabadka baarista iyo ka faa'ideysiga. Sidoo kale inuu siiyaa Maamulaha warbixin tifaftiran, qoralladdii iyo qorshihii la dejiyey ama la weydiin karo qodobbada iyo shuruudaha ruqsadda, fasaxa, oggolaashaha.
2) Kala baro bar qalabka dhulka laga soo saaro qodaallada waa inuu u kaydsan yahay milkiilaha, kuwaaso la socda qalabkawaafaqasanqaybaha joolojiyadaeela xiriiradiiwaangelinta, lana soo saaray muddada socotay ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha iyo, waqtiga dhiciddaas, qalabkaas, qaybaha joolojiyada iyo diiwaangelintu waa inay diyaar u yihiin Maamulaha ama Sarkaalka uu isaga soo magacaabay.
3) Haddii la fulin waayo, taasooka timid dhinaca haystaha, sida uu qabo qodobkan, Xoghayuhu wuu diidi karaa, iyadoo aan wax loo dhimin ciqaab kale ee haystaha muteysto, codsiga ruqsada, fasaxa ama oggolaanshaha, uu keensaday milkiilaha kor ku xusan.

## Qod. 23
## Waajibaadka milkiilaha ruqsada markay dhacdo

Soddon maalmood in aanay dhicin ruqsada, fasaxa ama oggolaashada macdan qodista, milkiiluhu waa inuu;

a) U keena xoghayaha ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha si loo baabi'yo;

b) Buuxiyaa ama haddii kale adkeeyaa difaac joogta ah ee ku qanacsan yahay maamuluhu dhammaan ceelasha, godadka macdanta iyo qodaallada kale, si looga hortago in dadka iyo xoolaha galaan iyadoo la ogeyn;
c) Ka qaadaa dhammaan calaamdaha xadeynta xuduudaha dhulka ku cad ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha u diro maamulaha ;
d) U diraa Maamulaha dhammaan qorshe hawleedka ha ahaato oogada sare ama dhulka hoostiisa, qorshooyin tifaftiran, dhuleed ama baarid, qaybo maadooyinka muhiimka ah laga soo saaro daloollada qoditaanka, io documenti kasta oo kale;
e) U keena Maamulaha qoraal uu ku caddeynaayo inuu raacay dhammaan xeerarka qodobkan inta uu ka waafaqsanyahay inuusan khatar u keenaynin dhammaan godadka iyo ka saaridda calaamada xadeynta.

## Qod. 24
## Masuuliyadda ka hor dhicitaanka ruqsada iwm

Dhicidda ruqsada, fasaxa ama oggolaashaha sabab kasta ha ku timaadee, haka mid ahaato wareejinta iyo u oggolaasho (?), sinna ugama reebaayaan haystaha masuuliyadda ee uu hore u galay waqtiga dhicitaanka la soo sheegay.

## Qod. 25
## Magacaabidda wakiilo macdan

1) Haystaha hadduusan deggeneyn goobta ruqsada tilmaameyso, fasaxa ama oggolaasho ama meel si ku filan u dhow si loo qabto kormeer joogta ah howlaha baarista iyo abuurista ee socda, wuxuu magacaabaya wakiilkiisa, ee ku qanci karo maamuluhu, maadaaama uu leeyahay diyaar garaow iyo waayo aragnimo macdanta ee ku filan uu ku ilaaliyo si joogta ah waxqabadkaas. Maamuluhu wuuka noqon karaa ansaxidaas, waqti kasta,.
2) Isbedl kasta ee magacaabidda wakiillada waa inay si degdeg ah loo gaarsiiyo maamulaha.
3) Magacaabidda iyo ansaxidda sare ku xusan kama reebayaan sinnaba milkiilaha waajibaadka iyo masuuliyadda ku xusan qodobada xeerkan iyo xeer-hoosaadka.
4) Qof kasta oo heysta fasax baaris, abuuris ama oggolaasho qodid macdan si gaar ah heysto, waliba hayste kasta ee oggolaasho sahmin, fasax, baaris ama ruqsad batrool, haddii uusan deggeneyn dhulka Jamhuuriyadda ama ay tahay shirkad xaruntiisa weyn ku taal meel ka baxsan dhulka Jamhuuriyadda, inuu magacaabo uuna lahaado waqti kasta wakiilkiisa ee deggen dhulka Jamhuurriyadda, haysto awood buuxda inuu matalo dhammaan arrimaha la xiriira waxqabadka baarista iyo abuuridda, ay ku jiraan waajibaadka uu saaro xeerkan ama xeer-hoosaadka iyo qodobbada iyo shuruudaha ruqsadaas, fasaxaas ama oggolaashaha (27/3-6).
5) Nuqul ka mid ah wakaaladda, ee uu saxiixay wakiilka inuu oggolaaday magacaabista, waa in si dhaqsi ah loogu gudbiyaa xoghayaha si lo diiwaangeliyo, sidoo kale waa la saxiixa, loona diraa xoghayaha mar kasta dokumentiyada xiga ee wax ka bedelaaya wakiilashada.

**CINWAANKA 3AAD**
Baaris iyo abuuris macdan, ka duwan petrol

**Qaybta 1aad**
Fasax baarista

**Qod. 26**
**Fasax baaris**

Qofna xaq uma laha inuu sameeyo baaris macdan ka duwan batroolka, isagoo haysan fasax baaris lagu siiyey si waafaqsan xeerarka ku qoran baabkan.

**Qod. 27**
**Siinta fasaxa baarista**

1) Xoghayuhu wuu awoodaa, kaddib markii loo keeno codsigawaafaqsan qaabka uu qeexaya (106/2, Xaraf. "a"), in uubixiyo fasaxa baarista si waafaqsan qaabka qof kasta;
   a) Gaaray da'a 21 sano;
   b) Muujin kara, hadba siduu u arko xoghayaha ama Sarkaal kale ee sidaas loo awood siiyey, inuu fahmo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyaha in la eg inuu awoodo inuu fuliyo waajibaadka ay fareen kuwaas.
2) Xoghayuhu wuu bixin karaa fasaxa baarista dhammaan macdanada, ka duwan batroolka, u furan baaris, ama macdananadahaas ama noocyada macdan uu is leeyahay in ay yihiin munaasib. Isagu wuu awoodaa inuu, xaddido xuquuqda baarista marka loo eego macdanada qaarkood ama noocyada macdan sidoo kale goobo cayiman ama meelo ka mid ah dhulka qaranka.
3) Marka waxqabadka baarista ay tahay in ay fuliso shirkad, urur, isku tag urur, dan wadaag ama hay'ad kale, waxay magacaabanayaan halama dad ka badan ee matila iyaga dhanka barista. Fasaxa baarista waxaa la siinaa loo magacaabaha ee ku shaqeynaayo magaca wakaaladda;
4) Marka codsiga fasaxa baarista la keeno ee la siinaayo qofka ku shaqeynaayo wakaalad qof saddexaad;
   a) Wakiilku waa inuu raaciyaa codsiga caddeyntiisa si waafaqsan qaabka la dejiyey, ee uu ku qaadaayo mas'uuliyadda falalka iyo fal reebka ee wakiishaha, si ka madax bannaan mas'uuliyaddiisa kan dambe;
   b) Wakiilku waa inuu ka tanaasulaa, kadib baabi'inta, fasax kasta ee rasmi ah baarista lagu bixiyey magaciisa iyo dartiisa.
5) Fasaxa baarista la siiyey wakiilka waxay dhammaaneysaa waqtiga uu dhammaado xiriirka kala dhexeeyo wakiishaha.
6) Xoghayuhu wuu diidi karaa inuu bixiyo fasaxa baarista qofkaas, oo isaga ama madaxdiisa ahaayeen markii hore;
   a) Haystaha xuquuq baaris iyo abuurid ee lagala noqday;
   b) Ku caddaatay mas'uuliyadda fal dembiyeed lid ku ah xeerkan (9-10; 101-105), ama xeer-hoosaad ama lid ku ah shuruucda ku saabsan xiriirka shaqo (143 – 145 Xeerka Shaqada).

## Qod. 28
## Muddada iyo dib u eegidda

Fasaxa baarista wuxuu ahaanaa rasmi muddo hal sano ah, laga billaabo taariikhda la oggolaaday, iyadoo la raacayocodsi waafaqsan qaabka loo dejiyey, wuxuu dib ucusbooneysiin karaa hadba waqti kale ee hal sano ah.

## Qod. 29
## Wareejin la'aanta fasaxa baarista

fasaxa baarista lama wareejin karo.

## Qod. 30
## Xuquuqda iyo waajibaadka ka dhasha fasaxa

1) Iyadoo la racaayo qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyaha, iyo shuruudaha fasaxa baarista, haystaha fasaxa baaristu wuu sameyn karaa baaris macdanta ku cad fasaxa dhul kasta ee aan si kale uga xirneyn baarista.
2) Haystaha waa inuu jooga goobta baarista ama dhammaan hawlaha kale ee lagu fuliyey qodobadda fasaxa baarista, si kastaba wuu ka qaban karaa goobtaas, kormeerkiisa tooska ah hoos imaanaya, tirade dadka uu u arko lagama maarmaan shaqadan a dadkaas lagama rabo fasax baaris.
3) Milkiilaha wuu, si waafaqsan xeerka, soohdimay karaa goobta, dib u weydiin kara fasax baaris, abuurid ama ruqsad macdan qodis gaar ah.

## Qaybta 2aad
Ruqsada baarista gaarka ah

## Qod. 31
## Siinta ruqsada baarista gaarka ah

1) Xoghayuhu, ka dib markii uumilkiiluhu soo gudbiyocodsiga fasaxa baarista oo waafaqsan qaabka hore loo dejiyey iyo xaqiijin in codsadaha haysto lacag ku filan waxqabadka si loo sugo habsami u socodka waxqbdka baarista goobta la soo codsaday, wuxuu siin karaa fasax baaritaan oo waafaqsan sida loo dejiyey qodobbada iyo shuruudaha ay la tahay munaasib.
2) Xoghayuhu, kaddib ansaxidda oggolaashaha ruqsada, wuxuu awoodaa, inta la sugaayo in la oggolaado, in uu dad u fasaxo bilaabidda shaqooyinka lagu qabanayogoobta ruqsada tilmaameyso.

## Qod. 32
## Goobta ruqsada

Goobta ruqsada baarista si gaar ah, kama badan karto siddeed mayil oo isku wareeg ah. Tankale, Xoghayuhu, ansaxidda golaha xoghayeyaasha kaddib, wuubixin karaa ruqsad baaris oo si gaar ah ku saabsandhul ka badan siddeed mayil isku wareeg ah, qodobbada iyo shuruudaha ayla tahay munaasib.

**Qod. 33**
**Muddada iyo Cusbooneysiinta**

Warqadda ruqsada gaarka ah waxay ansax tahay muddo hal sano ah, wuxuuna, kaddib codsi loogu keenay qaababka u degsan, cusbooneysiin karaa xoghayuhu, hadba marka ay la noqoto, muddo kale oo dheeraad ah ilaa hal sano mid kasta iyo waqti guud ahaan ka badneyn shan sano. Cusbooneysiintaas waa inay ku cadyihiin isla ruqsada.

Si kastaba, marka ruqsada dhulkeeda ka badantahay siddeed mayil isku wareeg ah, Xoghayaha wuxuu, kadib ansaxidda Golaha Xoghayeyaasha, bixin karaa cusbooneysiin kale sannadka kowaad kaddib, dhulka oo dhan ama qayb ka mid ah hadba qodobbada iyo shuruudaha uu is leeyahay waa munaasib.

**Qod. 34**
**Xuquuqda iyo waajibaadka ka dhasha ruqsada gaarka ah ee baaris**

1) Iyaddoo la raacaayo qodobbada xeerkan, qodobbadaxeer-hoosaadka iyo shuruudaha ruqsada baarista gaar ahaan, haystaha ruqsada xaq gaar ah buu u leeyahay inuu kusameeyo baaris macdan goobta ruqsada tilmaameyso macdanta la oggolyahay.
   Si kastaba, xuquuqdaas kuma fideyso goobaha ruqsado kale, fasaxyo ama oggolaasho ka kooban wareegga dhul ee ruqsada gaar ah, muddada jiritaanka ansaxnimada ruqsadaas, fasaxaas ama oggolaashaha.
2) Haystaha wuu keensan karaa codsi, si waafaqsan qaabka u degsan, si uu u helo fasax ka faaideysi ama ruqsad macdan qodis ku kooban goobta ku xusan warqadda fasaxa.
3) Muddada ay jirto waqtiga ansaxnimada ruqsada, haystuhu waa inuu fuliyaa si isdabajoog ah howlaha baarista goobaha ku tilmaaman ruqsada macdan ee qancisa maamulaha, marka laga saaro laalida shaqooyinka aheyn kuwo la oggolaaday, qaabka uu u dejiyey xoghayuhu.

**Qod. 35**
**Wareejinta ruqsada baarista gaar ahaaneed**

Haystaha ruqsada baarista gaar ahaaneed ama dan kasta ee iyada ka soo jeeda ma u wareejin karo dad kale ruqsadaas ama dano la oggolaaday iyadoon la heysan qoraal ansaxin ee xoghayaha.

**Qod. 36**
**Ka tanasulid ruqsada baarista gaar ahaaneed**

Way bannaantahay, waqti kasta, ka noqoshada ruqsada baarista si gaar ahaaneed, lagu sameeyey qaababka u degsan iyo inuu siiyo digniin 30 maalmood xoghayaha. Markaase, heystaha rabo inuu ka tanasula qeyb dhulka ku xusan ruqsada keliya, waa inuu u keenaa codsi waafaqsan qaabka loo dejiyey xoghayaha si loo ansaxiyo.

**Qaybta 3aad**
Fasax abuurid macdan

**Qod. 37**
**La soo bixid macdn ku xiran fasax abuurid ama oggolaasho macdan**

Marka laga reebo inta lagu sheegay qodobka 8aad, qofna xaq uma laha ka soo saarid macdano, ka duwan batrooka, fasax la'aan abuurid ama oggolaasho macdan lagu siiyey si waafaqsan xeerarka ku xusan Cinwaankan.

**Qod. 38**
**Helitaanka fasaxa abuurid macdan**

1) Haystaha fasax rasmi ah ee baaris ama ruqsad baaris gaar ahaaneed wuu u keensan karaa codsi, qaabka u degsan, xoghayaha si uu u helo fasax abuurid macdan.
2) Xoghayaha, markuu hubsado in codsigu yahay mid ansax ah iyo macdanta codsiga ku xusanna ay ku jirto dhulka la xaddiday, wuu u oggolaan karaa codsadaha fasaxa abuuris, qaabka u degsan macdannada ama noocyo macdan ee la bixiyey amar fasaxa baaris ama ruqsada baaris gaar ahaaned.

**Qod. 39**
**Muddada iyo Cusbooneysiin**

Muddada ansaxnimada fasaxa abuurid macdan waa hal sano laga billaabo taariikhda calaamadeynta xuduudaha goobta. Waa la cusbooneysiin karaa, iyadoo la raacayo qaabka u degsan, muddo dheeraad ah ee hal sano ayaa lagu sii kordhin karaamid kasta, marka laga reebo xaqiijinta dhanka xoghayaha in qodobbada xeerkan iyo xeer-hoosaadka yihiin kuwa la fuliyey iyoin hawlaha abuurista ku dhacaan si lagu qanci karo iyo xaalad nabadgelyo.

**Qod. 40**
**U rogid fasaxa abuurista oggolaasho macdan qodis**

Marka go'aanka hoxoghayaha iyo tallaabooyinka shaqada ee la xiriira fasax ama oggolaashaha abuuristu ay cudurdaar weyn u noqon karaan siismada ruqsada macdan qodista, ayaa xoghayuhu weyddiin karaa haystaha in uu soo qaddimo codsiga oggolaashaha qodista macdanta, oggolaashahaasna waxaa la waafajinayaa qodobbada iyo shuruudaha uu xoghayuhu u arko munaasib.

**Qod. 41**
**Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha fasaxaa abuurista macdanta**

1) Iyadoo xeerarka qodobbada 19 iyo 20 sidoo yihiin iyo xadadka loo dejiyey fasaxa abuurista macdanta, haystaha fasaxa wuxuu xaq u leeyahay in uu:
    a) Sameeyo baarista iyo ka soo saarista macdanta lagu tilmaamay fasaxa;
    b) Hagaajiyo macdantaas, si waafaqsan xeerarka ku jiraan cinwaanka 5aad;
    c) Uruuriyo iyo marka laga reebo xeerarka qodobka 96, ka sii daayo maado kasto ee laga soo saaro;

d) Dhismo iyo deegaano joogta ah iyo warshado, rakibid iyo joogteenta xaaladda matoorrada, mashiinada iyo qalab kale, ka aheyn ka dhisid iyo joogteen marriino, loo arko laga maarmaan shaqooyinka abuurista.

2) Inta lagu jiro muddada ansaxnimada fasaxa, haystuhu waa inuu u fuliyaa si joogta ah howlaha abuurista goobta ku cad fasaxa si raaligelineyso xoghayaha. Tan kale, xoghayuhu, kaddib codsi lagu keenay qaabka u degsan, wuxuu amri karaa haystaha inuu joojiyo si ku meel gaar ah shaqooyinka goobta ku xusan fasaxa muudo aan ka badneen 90 maalmood, marka uu ku qanco in duruufaha sidaasi dalbaayaan.

## Qod. 42
## Wareejinta fasaxa abuurista ama saamiyada

1) Iyadoo la raacaayo ansaxinta xoghayaha, ee aan laga noqon karin sabab macquul ah la'aanteeda, iyo xeerarka qod. 11aad, haystuhu, isagoo raacayaa qaabka loogu talaggalay, wuxuu, wareejin karaa fasaxa ama fasaxyada abuurista.
2) Iyadoo la raacaayo ansaxidda xoghayaha ee aan laga noqon karin sabab macquul ah la'aanteed, lahaadaha wuxuu, si qoraal ah, uqeybin karaa maslaxadiisa ku xiran fasaxa abuuris saamiyo badan markuu u arko munaasib, laakin tiro ahaan ka sarreynin laba iyo toban, sida degsan, wuuwareejin karaa saamiyadaas iyo weliba xuquuqda iyo faa'idada ka dhalata fasaxaas.
3) Haddii la sameeyey wareejinta saamiyo la xiriira fasax abuurid, dhamaan ama saamile kasta waxay noqon karaan masuul waajibaadka uu saaray xeerkan ama xeer-hoosaadka, haddii aan si kale loo dhigin qoraalka dhismaha saamiyadda.

## Qod. 43
## Ka tanaasulid fasaxa abuuris macdan

Way bannaan tahay ka tanasulidda fasaxa abuuris, goor kasta, digniin uuu gaarsiiyo haystaha fasaxa xoghayaha iyo inuu keeno fasaxa si loo baabi'iyo, ku lifaaqan tahay xaqiijinta ku xusan qod. 23aad.

## Qod. 44
## Ka noqoshada fasaxa abuurista macdan

Iyadoo aan wax loo dhimeyn xeerka qodobbada 9 iyo 10, fasaxa abuurista waxay ku xirantahay kala noqoshada arrimaha soo socda;

a) Marka, oggolaashaha fasaxa kaddib, la ogaado in goobta aan si rami ah loo xaddidin ka hor intaan codsiga la keenin;
b) Marka haystaha fasaxa joojiyo hawlaha muddo ka badan 14 maalmood bil gudaheeda, amar la'aan xoghayaha;
c) Marka haystaha fasaxa ka tago inuu keeno warbixin iyo qoraallo qeexan.
d) Marka haystaha fasaxa, digniinta qoraalka waajibka ah kaddib, ka taga inuu u xafido si nadaamsan calaamadaha xuduudda goobta.
e) Marka haystaha fasaxa uusan heysan diiwaan gelin sax ah.

## Qaybta 4aad
Ruqsad Macdaneed

### Qod. 45
### Helitaanka oggolaasho macdaneed

1) Qofka haysta oggolaasho baaritaan, ruqsad baaritaan qandaraas gaar ahaaneed amase oggolaasho hawlgal-macdaneed, muddada uu ku hawl jiro hawlaha sahmintana ka dhex hela dhulka tiro macaadiin ah oo wax-ku-ool ah, isla markaasna ka qabtay goobtaas shaqooyin horumarineed iyo qabanqaabooyin wax-soo-saarid amase hawlo kale oo baaritaaneed, kuwaasoo sida ay ula muuqato muujinaya iney suurtowdo in laga helo wax-soo-saar rasmi ah oo joogto ah muddo aan ka yareyn shan sano, wuxuu sida uu nidaamku yahay soo gudbisan karaa arji uu ku weydiisanyo in la siiyo rusqsad macdaneed.
2) Xogahayaha, haddii uu ku qanco caddeymaha uu soo hordhigay codsadaha, kaddibna uu xaqiiqsaday in:
   a) in codsadaha uu haysto amase uu heli karo raasumaal uu si caadi ah ugu socodsiiyo hawlgalka ceelka macdanta;
   b) isagoo haysta oggolaasha Golaha Xoghayeyaasha wuu bixin karaa ruqsad macdaneed, si waafaqsan nidaamka u degsan, kaddib markuu hubsado in uu hore u jiray amse la heli karo suuq loo iibgeeyo macdanta la soo saaro;

### Qod. 46
### Muddada iyo cusbooneysiinta oggolaasho macdaneed

1) Muddada ansaxsanaanta oggolaasho macdaneed kama yaraan karto shan sano, kamana badnaan karto kow iyo labaatan sano.
2) Qofka ruqsadda la siiyay, wuxuu awood u leeyahay inta aysan ansaxsanaanta ruqsaddiisa dhicin muddo lix bilood ah gudaheeda ah, inuu soo gudbisto arji uu ku weydiisanyo cusbooneysiin si waafaqsan nidaamka oggolaashaha. Xoghayahaya, markuu xaqiiqsado in qofka ruqsadda la siiyay uu hawlihiisa u gudanayo si caadi ah oo waafaqsan nidaamka ganacsiga, loona baahneyn in lagala noqdo, sida ku cad Xeerkan (9-10; 22, 44, 74) amase Nidaamka, wuxuu isagoo ku dulqoraya isla xaashida oggolaasha lagu bixiyay, cusbooneysiin karaa oggolaashahaas muddo dheeri ah oo aan ka badneyn kow iyo labaatan sano, sida ay ula muuqato macquul, isagoo qiyaas ahaan tixgelinaya inta ay hawshu socon karto.
3) Cusbooneysiin kasta waxaa lagu dhaqayaa shuruudaha lagu maamulo bixinta ruqsadda cusub.

### Qod. 47
### Ijaarka kirada baaxadda dhulka shaqadu ka socoto

Qofka ruqsadda la siiyay, wuxuu ka dhex cayimanayaa xeyndaabka baaxadda dhuleed ee ruqsadda loo siiyay dhexdiisa, aagga amase aagagga baaxadda dhuleed ee uu doonayo inuu kireysto, si uu ugu tallaabsado dhismayaal amase ku rakibto qalab lagu shiido qashinka, qodaallo waaweyn oo dhulka laga qodo, iwm oo goobahaas laga fulinayo, mana aha kuwo loo isticmaalayo waddooyin la maro, waxaana ku waajib noqonaya bixinta “kirada dhulka” qaddar lacageed oo cayiman, lana xiriira dhulkaas. Qaddarka kiradaas lacageed wuxuu is-beddeli karaa toddobadii sano hal mar, iyo qofka ruqsadda la siiyay oo qabtay hawlo la xiriira qodaallada dhulka inuu awood u leeyahay inuu isku kala

beddelan karo gudaha baaxadda dhuleed ee la siiyay, wuxuuna dhiibayaa ogeysiis, isagoo raacaya nidaamka loo dejiyay arrintaas.

**Qod. 48**
**Xuquuqaha qofka ruqsadda la siiyay**

1) Qofka ruqsadda la siiyay wuxuu xaq u leeyahay, marka laga reebo awaamirta ku qoran qodobbada 19 iyo 20 ee ku saabsan xadka baaxadda dhuleed ee ruqsadda la bxiyay, arrimaha soo socda:

   a) inuu ka dhex sameeyo dhulka ruqsadda loo siiyay baaritaanno iyo soo saaris macaadiin;
   b) marka laga reebo awaamirta ku cad Cinwaanka shanaad, inuu sii socdsiiyo ka-shaqeynta macaadiintaas amase haraaga ka dhasha inuu iibgeysto oo uu rarto iyo weliba inuu habeyn karo;
   c) inuu uruuriyo iyo, marka laga reeebo amarka ku qoran Qod.96aad, inuu iska rogo alaabta uu soo saaro;
   d) inuu sameeyo dhammaan qodaallada loo arko iney yihiin lagama maarmaan;
   e) inuu dhiso, xannaaneeyo guryaha la degganyahay, dhismayaalka, rakibo motoorrada, qalabka motoorrada ku shaqeeya, hoosooyinka iyo wixii qalab kale ah oo rakiban iyo weliba inuu dhiso, xannaaneeyana waddooyinka marinnada ah, kuwaasoo loo arko mhuim iney u yihiin hawlqabadka macdanta.

2) Inta uu sugayo bixinta ruqsadda macdanta, codsadaha wuxuu u gudbin karaa Xoghayaha arji uu ku weydiisanayo inuu u oggolaado billaabista hawlaha soo-saarista macdanta sida ku cad baaxadda dhuleed ee ku tilmaaman ruqsadda amase qaybo ka mid ah.

Xoghayaha wuuxu raacin karaa oggolaashahaas shuruudo iyo xuduud uu u arko iney daw yihiin iyo inuu weliba kala noqon karo goor walba oggolaashahaas.

**Qod. 49**
**Waajibka la rabo in lagu shaqeeyo ruqsadda**

Qofka oggolaasha la siiyay, inta uu ku gudajiro dhammaan muddada uu ansaxa yahay oggolaashihiisa, waxaa waajib ku ah inuu hawlgalka macdanta uu ku fuliyo si niyadsami ah oo aan kala go’ laheyn, taasoo uu ku qanci karo Xoghayaha.

Hase ahaatee, Xoghayaha, kaddib markuu eego codsi loogu soo gudbiyay siyaabaha waafaqsan nidaamka, haddey ula muuqato, wuxuu awood u leeyahay inuu amro qofka ruqsadda la siiyay inuu hakiyo shaqooyinkii uu ka waday baaxaddii dhuleed ee ruqsadda, muddo aan ka badneyn lix bilood.

**Qod. 50**
**Wareejinta ruqsadda amase danaha la xiriira**

Qofka ruqsadda la siiyay, marka laga reebo xaalad si qeexan loogu muujiyay qodobbada ruqsadda, ma uu wareejin karo ruqsaddiisa amase kama uu sameyn karo amase wareejin karo xuquuqo amase dano ruqsaddaas la xiiriira, haddii aan wareejintaas amase danahaas uusan Xoghayaha ku oggolaan si waafaqsan habraaca degsan.

**Qod. 51**
**Ka-tanaasulidda ruqsadda**

Waxaa bannaan ka-tanaasulidda ruqsadda habraacii loo dajiyay la soo waafajiyay, dhammaanteed amase qayb ka mid ah, kaddib markii ogeysiis digniin ah oo lix bilood ah la siiyo Xoghayaha.

## CINWAANKA 4AAD
Shidaal

### Qaybta 1aad
Awaamir Guud

**Qod. 52**
**Xadka lagu dhaqayo Cinwaankan**

Awaamirta ku cad Cinwankan ee la xiriira fulinta, sahminta iyo ka-shaqeynta macdanta waxay si gaar ah ugu kooban yihiin shidaalka.

**Qod. 53**
**Mamnuucidda baarista amase soo-saarista aan oggolaasho amase ruqsad loo haysan**

Waxaa qof kasta laga mamnuucay inuu ku tallaabsado fulinta, sahminta iyo soo-saarista shidaalka, haddii aysan waafaqsaneyn oggolaashaha amase ruqsadda lagu bixiyay sida ku cad awaamirta Cinwaankan (104-105).

**Qod. 54**
**Bixinta oggolaasha rusqsadaha, iwm**

1) Marka laga reebo qodobbada Xeerkan iyo Nidaamka, Xoghayaha, isagoo raacaya oggolaashaha Golaha Xoghayeyaasha, raacayana habraaca u degsan, wuxuu bixin karaa:

    a) ruqsad sahmin ah si loo baaro batrool meesha uu ku dhammaado iyo biyaha meelaha ugu hooseeya[3], kana mid ah amase deris la ah dhulka Jamhuuriyadda, sidaasna lagu qeexay ruqsadda;
    b) ruqsad sahmin oo ujeedkeedu yahay riig-qodid, soo-saaris iyo qaadis oo loola jeedo mid tijaabooyin iyo baaaris sheybaar la soo marinayo oo la xiriira batroolka, marka laga soo billaabo cirifyada uu ku dhammaado iyo biyaha meelaha ugu hooseeya, uuna ka mid yahay amase deris la yahay dhulka Jamhuuriyadda, sidaasna lagu qeexay rusqsadda.
    c) ruqsad macdaneed ee la xiriirta baaritaan, sahmin, soo-saaris, qaadis iyo ka-shaqeynta macdanta oo loogu talo galay iibgeyn iyo in laga soo qaado batroolka cirifyada hoose iyo biyaha hoostooda, kana mid ah amase deris la ah dhulka Jamhuuriyadda, sidaasna lagu qeexay ruqsadda.

[3] Eeg xusuusinta uu tilmaamayo Qod. 2aad ee Xeerka Macdanta.

2) Bixinta oggolaashaha iyo ruqsadaha kor lagu soo sheegay, waxay ku xirnaan karaan shuruudaha iyo nidaamka uu u dejiyo Xoghayaha, kaddib marka la helo oggolaasha Golaha Xoghayeyaasha.

Intaas waxaa sii dheer, in shuruudahaas iyo nidaamkaas aysan noqon kuwo ka hor yimaada amase aan waafaqsaneyn qodobbada lagu qeexay Xeerkan amase Nidaamka.

**Qaybta 2aad**

Oggolaashaha sahminta batroolka

**Qod. 55**
**Muddada iyo cusbooneysiinta**

1) Muddada bilowga ah oo uu ansax yahay oggolaashaha sahminta batroolka waa labo sano.
2) Qofka ku qoran oggolaasha inta aysan dhicin muddo ku siman saddex sano, wuxuu isagoo raacaya nidaamka loo dejiyay weydiisan karaa Xoghayaha in loo cusbooneysiiyo.
3) Xoghayaha, kaddib marka uu helo oggolaashaha Golaha Xoghayeyaasha, wuxuu cusbooneysiin karaa oggolaashahaas, muddooyin aan ka badneyn saddex jeer oo isku xiga oo tiiba ay tahay hal sano, lana xiriirta guud ahaan amase qayb ka mid ah baaxadda dhuleed ee ku cad oggolaashaha.

**Qod. 56**
**Baaxadda dhuleed sida ku cad oggolaashaha**

Oggolaashaha sahminta batroolka wuxuu ka mid noqon karaa baaxadda dhuleed amase baaxadaha dhuleed ee lagu cayimay oggolaashaha iyadoo aan wax xad ah loo eegin ballacooda.

**Qod. 57**
**Waajibka saaran cidda oggolaasha la siiyay iney ka hawlgalaan baaxadda dhuleed ee loo oggolaaday**

Qofka la siiyay oggolaashaha, marka laga reebo shuruudaha lagu tilmaamay oggolaashaha sahminta batroolka, waxaa ku waajib ah, in sida ugu dhaqsida badan ee macquulka ah iyo xaalad kasta oo jirtaba, inuu muddo aan ka badneyn afar bilood marka laga soo billaabo goortii la siiyay oggolaashaha, uu ku billaabo sahmin baaxadda dhuleed ee ku cayiman oggolaashahaas, isagoo raacaya hababka jayaloojiyadeed iyo/amase jayofiisikadeed, waana inuu, marka la eego oggolaashaha, uu sii wadaa inuu ku socodsiiyo shaqooyinka lagama maarmaanka u ah in la cayimo qaab-dhismeedka jayaloojiyadeed ee dhulka, isagoo ku dhaqmaya taxaddarka ku habboon.

Hase ahaatee, qofka ku qoran oggolaashaha hadduu damco inuu ku tallaabsado shaqooyin baaris amase riig-qodid ah, waxaa ka reebban inuu ku tallaabsado shaqooyin baarista ah amase riig-qodidda ah oo aan dhererka qoditaankoodu ka badneyn 1500 cagood, haddii aan hore loo haysan oggolaasho qoran ee Xoghayaha.

**Qaybta 3aad**
Oggolaashaha baaritaan batrool

**Qod. 58**
**Bixin oggolaasho**

Oggolaashaha baaritaanka batroolka waxaa la siiyaa oo qura:

a) qofka haysta oggolaasho sahmin batrool (53-57), taasoo waafaqsan isla baaxadda dhuleed ee oggolaashaha baaista;
b) qofka haysta oggolaasho baaris batrool ee baaxad-dhuleed oo la daris ah.

**Qod. 59**
**Cabbirka baaxadda dhuleeda ee oggolaashaha**

Oggolaasha baarista batroolka laguma bixin karo dhul uu cabbirka wareeggiisu ka badan yahay 500 mayl oo wareeg ah.

**Qod. 60**
**Muddada iyo cusbooneysiinta**

1) Muddada bilawga ah ee ansaxsanaanta oggolaashaha baaritaanka batroolka waa labo sano.
2) Saddex bilood guahooda inta aysan dhicin muddadaas, qofka haysta oggolaasha, isagoo dhowraya qaabka nidaam ahaan u degsan, wuxuu weydiisan karaa Xoghayaha in loo cusobooneysiiyo.
3) Xoghayaha, kaddib markuu helo oggolaashaha Golaha Xoghayeyaasha, wuxuu cusbooneysiin karaa in aan ka badneyn saddex jeer oo isku xigta oo kiiba muddadiisu tahay hal sano, dhammaan amase qayb ka mid ah baaxadda dhuleed ee lagu cayimay oggolaashaha.

**Qod. 61**
**Waajibka la rabo in laga shaqeeyo baaxadda dhuleed ee ku cayiman ruqsadda**

1) Marka laga reebo shuruudaha lagu qeexay ruqsadda baarista batroolka, qofka ku qoran ruqsadda, shaqooyinkiisa jayloojiga iyo kuwa jayofiisikada ah ka sokoow, waxaa u weheliya in uu fuliyo barnaamij rig-qodid ah, si uu uga xaqiiqsado in baaxadda dhuleed ee ruqsadda la siiyay uu ku jiro batrool ceeriin ah.
2) Qorshaha hawlgallada waa in lagu fuliyaa si waafaqsan barnaamijka loo soo bandhigay Xoghayaha, isaguna uu oggolaaday. Haddii ay dhacdo in isla hal qof la siiyo in ka badan hal ruqsad ee baaris batrooleed, barnaamijka rig-qodidda ah ee ruqsaddaha kala duwan, waxaa ku wada heshiinaya qofka ku qoran iyo Xoghayaha.

**Qaybta 4aad**
Ruqsadda batroolka

**Qod. 62**
**Bixinta ruqsadda**

Bixinta ruqsadda batroolka waxaa la siiyaa oo qura:

a) qofka ku qoran oggolaasho sahmin batrool (52-61), isla baaxadda dhuleed ee ku cayiman oggolaashaha;
b) qofka ku qoran oggolaasho kale ee batrool ee baaxad dhuleed oo la deris ah.

**Qod. 63**
**Bixin ruqsad batrool oo ka kooban dhulal badan**

Xoghayaha, kaddib markuu helo oggolaashaha Golaha Xoghayeyaasha, wuxuu bixin karaa ruqsad batrool oo ka kooban labo ama in ka badan baaxado dhuleed, haddii dhulalkaas ay ka siman yihiin isla qaab-dhismeedka jayloojiga amase ay koox ahaan qaab-dhismoodkoodu is-le'eg yahay amase is-shaabbahaan.

**Qod. 65**
**Muddada iyo cusbooneysiinta**

1) Muddada bilowga ah ee ansaxsanaanta ruqsadda kama ay badnaan karto soddon sano. Kolka ay dhammaato muddadaas, Xoghayaha wuxuu oggolaan karaa, sida ay la tahay, in ruqsadda la cusbooneysiiyo muddo amase muddooyin u dhigma inta uu le'eg yahay haraaga wax-soo-saarka dhabta ah ee macdaneed, muddadaas oo guud ahaan aan marnnaba ka badneyn lixdan sano oo ruqsad walba la xiriira.
2) Cusbooneysiin kasta ee ruqsad batrool waxay ku xiran tahay dib-u-eegis lagu sameynayo shuruurdihii awal lagu bixiyay, iyadoo loo eegayo xaaladaha dhabta ah ee jira kolka cusbooneysiinta la weydiisanayo.

**Qod. 66**
**Waajibka la rabo in looga shaqeeyo baaxadda dhuleed ee ruqsadda lagu baxshay**

Kolka laga reebo awaamirta guud ee Xeerkan iyo Nidaamka iyo shuruudaha loo dejiyay bixinta ruqsadaha, qofka ruqsadda la siiyay waxaa goor walba waajib ku ah inuu hormariyo, soona saaro batroolka uu helay sida ugu sarreysa oo dhaqaale ahaan ugu macquulsan, uguna habboon, waafaqsanna nidaamka suubban ee farsamada tiknoloojiyada.

**Qod. 67**
**Xuquuqaha qofka ruqsadda haysta**

1) Haddii aan si ka duwan loogu sheegin qodobbada Xeerkan, Nidaamka iyo shuruudaha loo dejiyay bixinta ruqsadda, qofka ruqsadda la siiyay waxaa waajib ku ah:

a) inuu sameeyo baaritaanno iyo soo-saarid batrool inta ku eg xeyndaabkiisa dhuleed iyo inta ka hooseysa biyaha oo ka mid ah bixinta ruqsadda;
b) Marka laga reebo awaamirta ku xusan Cinwaanka 5aad, inuu sii wado farsameynta macdanta si uu u iibgeeyo, u raro, una diyaariyo dhammaan waxyaabaha batroolka, kuwa adag, kuwa dareere ah iyo kuwo gaas ah iyo weliba iyadoo la waafajinayo Qod. 96aad in meel gaar ah la dhigo haraaga ka dhasha soo-saaridda amase oggolaashaha farsameynta macdanta;
c) In laga dhex dhiso lana dayactiro inta ku eg baaxadda dhuleed ee ruqsadda la oggolaaday: guryo la dego, guryaha diyaarsan oo la isku xir-xiro, matoorro, qalab makiinadeed, hoosooyin-shaqo iyo dhismayaal kale iyo weliba laga dhiso marinnada lagama maarmaanka u ah in si caadi ah loogu fuliyo hawl-qabadka lagu qeexay ruqsadda;
d) marka laga reebo awaamirta ku qeexan sharciyada haatan jira ee dhulka, in laga shaqeysiiyo lana xannaaneeyo qalabka iyo dhismeyaal yaal deegaan kasta ee Jamhuuriyadda, uuna soo oggolaaday Xoghayaha, kuwaasoo lagama maarmaan u ah wax-qabadka iyo horumarinta ganacsiga batroolka.

## Qaybta 5aad
Awaamir kala duwan

### Qod. 68
### Wareejinta oggolaashaha iyo ruqsadda

1) Iyadoo aan oggolaasho qoran hore looga haysan Xoghayaha (85) cid kale looma wareejin karo oggolaashaha baaritaanka (55-57), oggolaashaha sahminta iyo ruqsadda batroolka (62-67).
2) Xoghayaha wuxuu awood u leeyahay inuu bixiyo oggolaashaha, isagoo sal uga dhigaya shuruudaha ay ula muuqdaan iney yihiin daw, wuxuuna ka dalbi karaa qofka loo wareejinayo oggolaashaha ruqsaddaas shardi, inuu isagoo kharajka ku waajibay uu la baxaya uu soo saxiixo, dokumenti qaanuunka waafaqsan oo uu ku ballanqaadayo inuu fulinayo waajibaadka ka saaran ee lagu faray oggolaashaha amase ruqsadda.

### Qod. 69
### Ka-tanaasulidda oggolaashaha amase ruqsadda

Waxaa bannaan in laga tanaasulo dhammaan amase qayb ka mid ah oggolaashaha sahminta, oggolaashaha baaritaanka amase ruqsadda batroolka, haddii la soo marsiiyo nidaamka loo dejiyay, kaddibna Xoghayaha la siiyo digniin lix bilood ka hor ah.

### Qod. 70
### Xuquuqaha galitaanka goobaha ka baxsan sahminta

Iyadoo aan waxba laga beddeleynin awaamirta ku cad Qod.6aad, qofka ku qoran oggolaashaha baaritaanka amase ruqsadda batroolka, laguna baxshay siyaabaha waafaqsan awaamirta Cinwankan, wuxuu awood u leeyayay, inuu Xoghayaha u qoro digniin ugu yaraan laba toddobaad ka hor ah, isagoo raacayaa shuruudaha loo dejiyay oggolaashaha amase ruqsadda, in uu galo goobaha lagu cayimay xuruufaha (c), (d), (f), (g), (h), (i), (j), (k), (l), (m) iyo (n) ee Qod.6aad, iyadoo ujeeddadiisu tahay inuu ka sameeyo baaritaan jiyoloojiyadeed, sahmin iyo cabbiraad dhuleed amase mid la xiriirta cilmiga biyaha.

Hase ahaatee, qofkaas ku qoran oggolaashaha amase ruqsadda, waxaa isaga waajib ku ah inuu:

a) inuusan qodin amase uusan wax ka beddelin dusha dhuleed ee goobahaas;
b) inuusan ku tallaabsan nooc kasta oo sahmin amase baaritaan rig-qodid ah;
c) inuu hawlihiisa ku fuliyo isagoo waxyeellada ugu yar u geysanaya goobahaas;
d) inuu isla markiiba magdhaw ka bixiyo khasaare amase dhib kasta oo uu geystay kolka ay dhammaato muddadii loo qabtay sahminta goobahaas kor lagu soo sheegay (20).

## CINWAANKA 5AAD
Saamiga, Dhoofinta iyo Iibeynta Gudaha ee Macaadiinta

### Qod. 71
### Waajibka bixinta saamiga

1) Dhammaan macaadiinta la helo inta lagu guda jiro baaritaanka amase ka-shaqeynta macdanta amase wax kasta amase maaddo kasta oo la soo saaro, waxaa ku waajib noqonaya bixinta lacagta saamiga ah oo lagu caddeeyay Nidaamka (106(2), xarafka "b").
2) Marka laga reebo awaamir kasta oo ku qeexan Xeerkan amase Nidaamka, waajibka bixinta lacagta saamiga ah waxay ansax noqoneysa kolka ay billaabato ka-shaqeynta macdanta.
3) Kolka aysan suurtoobin, ka hor inta aan macdanta la dhoofin amase aan lagu iibin suuqa gudaha, waaxaa loo baahan yahay in la xisaabiyo tirada lacageed oo saxda oo ku waajibtay bixinta saamiga lacageed, kolkaasna waxaa la bxinayaa saami lacageed oo ku-meel-gaar ah oo qaddarkeedu xaddidayo Xoghayaha, isagana loo dhiibayo. Xisaabinta kama-dambeysta ah waxaa la sameynayaa kolka la helo xisaabaadka la xiriira iibgeynta, baarista sheybaarku soo saaro, qiimeynta iyo dokumentiyo kale oo lagama maarmaanka u ah in qiime loo gooyo saamiga lacageed ee ku waajib noqonaya.
4) Xoghayaha wuxuu cafin karaa waajibka la xiriira bixinta lacagta saamiga ah kolka tirada macdanta uu u arko iney lagama maarmaan u tahay ujeeddo la xiriirta tijaabo, sheybaar lagu faaqidayo, namuun amase sambal ganacsi amase mid cilmi-baaris ah. Cafiskaas waa in lagu muujiyaa ruqsadda dhoofinta.

### Qod. 72
### Macdanta la helo inta lagu guda jiro baarista

1) Marka laga reebo shuruudaha lagu sheegay oggolaashaha amase ruqsadda baaritaanka, wixii macaadiin ah oo la helo inta lagu guda jiro baaritaanka waxaa hantidooda iska leh Dawladda, hase yeeshee qofka ku qoran ruqsadda amase qof kasta oo kale kama uu qaadi karo baaxadda dhuleed ee ku cayiman oggolaasha amase ruqsadda haddii aan oggolaasho qoran laga haysan Xoghayaha, kaasoo idmaya qaadistooda, si loogu xafido meel la hubo amase sabab kasta oo kale oo ay ula muuqato, waxaana loo hoggaansamayaa shuruudaha uu isagu dejiyo.
2) Kolka uu Xoghayaha xaqiiqsado in codsadaha uu shaqooyinkii lagamamaarmaanka ahaa ku fuliyay si caqligal ah, si ay ugu suurtagasho inuu tijaabiyo tayada macdanta ee baaxadda dhuleed ee loogu cayimay oggolaashaha amase ruqsadda, Xoghayaha wuxuu u oggolaan karaa in codsadaha uu haysto amase uu habeeyo macdantaas kaddib markuu iska bixiyo saamiga u dhigma ee ku waajibay.

**Qod. 73**
**Dhoofinta iyo iibgeynta gudaha ee macaadiinta**

1) Waxaa ka reebban qof kasta dhoofinta macdanta, alaab kale amase wax laga soo shaqeeyay oo asalkoodii hore ka soo jeeday macdan, kuwaasoo aan haysan ruqsad dhoofineed oo lagu bixiyay si waafaqsan qodobbada Xeerkan amase Nidaamka, ayna weheliso warqad caddeyneysa inuu bixiyay saamiyadii amase bixinta saamiyadaas laga hayo damaanad uu Xoghayaha aragtidiisa ku qancay (104-105).
2) Agaasimaha amase sarkaal kale oo arrintaas loo igmaday, wuxuu awood u leeyahay inuu baaro shixnadaha macdanta inta aan la dhoofin, kana soo qaado namuunnada amase samballada iyadoo aan lacag laga qaadin, si uu u xaqiiqsado waxa ay macaadiintaasi ka kooban yihiin iyo qiimahoodaba.
   Waxaa intaas dheer, namuunnada amase samballada macaadiinta haraaga noqday kaddib markii baaritaan sheybaar ay soo maraan, in dib loogu celiyo dhoofiyaha, haddii uu sidaas codsaday kolkii namuunnadaas laga soo qaadayay.
3) Haddiise macaadiinta, alaabta amase walxaha macaadiinta ah laga iibiyo qof deggan Jamhuuriyadda gudaheeda, ujeeddo kasta ha laga lahaadee, kolkaas qofka ku qoran ruqsadda ee uu leh xuquuq baaritaan iyo ka-shaqeynta macdanta, waxaa ku waajib noqoneysa inuu muddo hal bil ah gudaheeda oo laga soo billaabayo kolka uu rasmi ahaan iibinta sameeyay, inuu bixiyo saamiyada ku waajibay ee loo dejiyay macaadiintaas amase alaabtaas macdanta la xiriirta, haddii bixinta saamiyadaas aan laga hayn damaanad uu Xoghayaha aragtidiisa ula muuqatay mid uu ku qancay.

**Qod. 74**
**Diiwaannada hawlaha wax-kala-iibsiga**

Qofka ku qoran oggolaashaha ka-shaqeynta, ruqsadda macdanta (45) amase ruqsadda batroolka (62-65) iyo weliba qof kasta oo gata amase iibiya macaadiin amase alaabooyin macdaneed (79), waxaa ku waajibeysa, isagoo dhowraya qaabka uu u jideeyay Xoghayaha, inuu u haysto diiwaanno ku habboon oo lagu muujinayo tirada macdanta amase alaabta macdaneed ee la soo saaray amase la helay, la soo gatay amase la iibiyay iyo weliba xisaabaha lagu shubo ee la xiriira soo-iibsashadooda, iibintoooda amase dhoofintoodaba.

**Qod. 75**
**Ruqsadda tirooyin yar yar ee macdaneed**

Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay inuu u oggolaaday qof kasta ruqsad uu ku haysto amase uu ku soo gato tirooyin yar yar ee macaadiin ah, iyadoo shuruudahooda lagu faahfaahin doono isla ruqsaddaas.

**CINWAANKA 6AAD**
Xadeyb Haysashada iyo ka-ganacsiga Macdanta

**Qod. 76**
**Xadeyn haysashada macdanta**

1) Sida ay qorayaan awaamirtan ku qeexan Cinwankan, Xoghayaha kaddib markuu helo oggolaashaha Golaha Xoghayeyaasha, wuxuu isagoo dekreeto ku shaaciyay Faafinta Rasmiga ah, xannibi karaa

haysashada iyo ka-ganacsiga macdanta (94). Dekretadaas, waxaa lagu caddeyn karaa heerka ay gaarsiisan tahay ka-shaqeynta macdanta la xadeeyay amase dhaqangalka xadeyntaas baa la joojinayaa.

2) Waxaa ka reebban haysashada macdanta la xadeeyay qofkii:
   a) aan aheyn wakiil macdaneed ee loo igmaday (78-79), sida ku cad awaamirta Cinwankan;
   b) aanna u haysan xuquuq baaritaan (26-36) amase ka-shaqeyn macdaneed (37), kuwaasoo si qeexan loogu oggolaaday iney sameeyaan baaritaan iyo ka-shaqeynta macdantaas;
   c) aheyn qof uu Xoghayaha siiyay ruqsad uu ku haysto tirooyin yar yar ee macdaneed, sida ku cad Qod. 75, kuna haysta si waafaqsan shuruudaha isla ruqsaddahaas;
   d) aan aheyn shaqaale, si sharciga waafaqsanna loogu igmaday, ka mid aheyn dadka lagu qeexay xarfaha ka billowda (a) ilaa (d) ee faqraddan, xilalkiisa rasmiga ahna ay ku waajib yeelayaan iney lagama maarmaan u tahay haysashada macdantaas.

**Qod. 77**
**Ka-ganacsiga macaadiinta**

1) Waxaa ka reebban qof kasta oo wakiil macdaneed ah amase ruqsadda macdanta lagu siiyay si waafaqsan Qod. 75aad, inuu dalka gudihiisa cid saddexaad ka iibiyo amase ka soo iibsado macaadiin sharcigu xaddidaad saaray (104-105).
2) Qodobkan, ereyada "*ka iibiyo*" amase "*ka soo iibsado*" waxaa soo galaya wax-kala-beddelesho amase wax-is-dhaafsi, dhiibis amase guddoomid deeq (483 iyo kuwa soo raaca ee Xeerka Madaniga) amase rahanta hantida guurtada ah (885 iyo kuwa soo raaca ee Xeerka Madaniga) iyo nooc kasta oo kale oo wax lagu soo iibsanayo amase wax lagu tasarrufayo.

**Qod. 78**
**Ruqsadda wakiilka macdaneed**

Xoghayaha wuxuu awood u leeyahay inuu bixiyo ruqsadda wakiilnnimada macdanee, si waafaqsan qodobbada loo dejiyay, isagoo raacaya shuruudaha ay ula muuqato iney daw yihiin. Ruqsaddaas waxaa soo gali kara oggolaasho kale oo uusan sharcigu diiddaneyn.

**Qod. 79**
**Waajibaadka saaran wakiilka macdaneed ee idman**

1) Wakiilka macdaneed ee idman waa inuu Dawladda u shubo saamiyada ku waajibay ee la xiriira macaadiinta uu sharcigu saaray xayiraadda ee uu isagu soo iibsaday, amase uu ku helay si waafaqsan awaamiirta Cinwankan iyo haddii uu weydiiysto Xoghayuhu inuu macaadiintaas ka keeno dammaanad.
2) Wakiilka macdaneed ee idman waxaa ku waajib ah:
   a) inuu haysto diiwaan ay ku qoran yihiin:
      i) dhammaan dhaqdhaqaaqyada la xiriira kala-gadasho iyo kala-iibsi macdaneed ee uu isagu fuliyay;
      ii) nooca iyo culeyska macaadiinta;
      iii) taariikhda dhaqdhaqaaq kasta oo ganacsi;
      iv) magacaiyo cinwaanka iibiyaha, iyo mansabka uu iibiyahaas ku kasbaday haysashada macdantaas;

v) magaca iyo cinwaanka uu iibsadaha amase qofka loo dhiibay macaadiinta la iibiyay;

b) inuu fuliyo in dhaqdhaqaaq kasta oo ganacsi lagu qoro diiwaankaas muddo afar iyo labaatan saac gudahood ah marka laga soo billaabo goortii la fuliyay;

c) inuu diiwaankaas tusiyo goor kasta oo uu soo weydiisto Xoghayaha ama sarkaal kasta oo uu si qoraal ah ku soo wakiisho amase sarkaal boolis ah;

d) Inuu siiyo xisaab-celin Agaasimaha (1), goor kasta oo uu sidaas soo weydiisto.

## CINWAANKA 7AAD

Badaadada, Kormeerka iyo Shilalka Goobaha Shaqada

### Qod. 80
### Ammaanka guud ahaaneed

1) Qofka ku qoran oggolaashaha, ruqsadda amase fasaxa loo siiyay macdanta waxaa laga doonayaa inuu qaado dhammaan tallaabooyinka looga baahanyahay iyo taxaddarrada ku habboon ee raalli gelinaya Agaasimaha, kuwaasoo dammaanad qaadaya badbaadada dhammaan shaqaalaha isaga hoos yimaada ee qaabbilsan sahminta iyo ka-shaqeynta macdanta.
2) Qofka ku qoran ruqsadda lagu siiyay oggolaashaha amase fasaxa macdanta, waa inuu ruqsaddaas muddada ay ansaxa tahay gudaheeda qaado tallaabooyin uu ku daryeelayo dhammaan qodaallada godadka dhulka hoostiisa ah, ceelasha, godad amase qodaal kasta oo kale oo hore loo sameeyay amase ka dambeeyay isla markii uu helay oggolaashaha, si looga hortago in goobahaas ay dad amase xoolo galaan iyagoon ka fiirsan.
3) Qofka ku qoran ruqsadda waxaa laga doonayaa oo kale, inuu ku tallaabsado dhammaan taxaddarrada ku habboon, si looga hortago in qof uu ku dhaawacmo kolka goobta shaqada macdantu ka socoto lagu qarxinayo miinooyinka amase kolka ay hawlgal ku jiraan qalab rakiban, makiinado, qalab rakiban oo si talantaalli ah iyagoo iska daba wareegaya alaabta lagu qaado amase kuwo fidsan oo iyaguna alaabta lagu qaado, khadadka telegraamyada iyo haddii uu jiro amase ay soo bixi karto khatar, waa inuu sameeyo deyr amase xeyndaab ku habboon, xabbad-dhawryo iyo digniino ka hortagaya khatarta.
4) Qofka ku qoran oggolaashaha, ruqsadda amase fasaxa macdanta, waxaa looga baahanyahay kolka uu hawlgal shaqo ka socoto godadka hoose ee dhagaxa dhexdooda, quruuraxa amase jaayga amase ciidda ah, amase meel kasta oo kale oo ka-shaqeyn macdaneed ah oo hawada bannaanka u furan, inuu dammaanad qaado in qaybaha godadka ay yihiin kuwo si dadban hoos loogu sii daadagi karo amase leeyihiin jaranjarooyin xiriirsan, dherarkooduna xaddidan yahay, si looga hortago in dhulku soo dumo, waana inuu qaado taxaddarrada ku habboon, si looga hortago in qalaba soo dhaca uu waxyeellooyin dhaawac ah u geysan karo shaqaalaha ka hawlgalaya qaybaha godka.

### Qod. 81
### Kormeerrada guud

1) Agaasimaha, Sarkaalka caafimaadka ee uu soo magacaabay Xoghayaha Dawladda ee caafimaadka, halkan wixii ka dambeeyana lagu magacaabi doono “Sarkaalka Caafimaadka”, amase qof kale ee uu si qoraal ah u soo igmado Xoghayaha, ha ahaato maalin amase habeen, iyadoo shardi looga dhigayo

inuusan hor-istaagin amase ka dhigin waxa aan suurtagaleyn shaqadii socotay, wuxuu awood u leeyahay:

i. inuu galo, baaro, fatasho qayb kasta oo ka mid ah baaxadda dhuleed oo ay ka socdaan hawlaha sahminta, ka-shaqeynta macdanta amase daw loogu leeyahay xaq la xiriira sahmin, ka-shaqeyn amase xaq marin la maro;
ii. inuu fatasho, kuna tallaasado baaritaanno la xiriira xaaladaha hawa-siinta ee godadka macdanta amse dhismo kasta oo la xiriira hawlaha sahminta, ka-shaqeynta macdanta amase xaqa marin la maro iyo wax kasta oo la xiriira badbaadada, ladnaanta iyo xaaladaha caafimaad ee meelahaas ka shaqeeya;
iii. inuu baaro, dusha korena ka kormeero xaaladaha makiinadaha loo isticmaalay godadka macdanta, marinnada la maro iyo xaaladda ay ku sugan yihiin qalabka rakiban iyo shaqooyinka;
iv. inuu fatasho sida loo xifdiyay waxyaabaha qarxa ee loo isticmaalo godadka macdanta iyo inuu awaamir ka bixiyo siyaabaha loo xafido;

2) Xoghayaha amase qofka uu isagu si qoraal ah u soo igmado, waxay awood u leeyihiin iney weydiistaan, fatashaan, eegaanna dhammaan bogogga diiwaannada (74), nuqullada xisaab-celinta, dokumentiyada sababeysan iyo dokumentiyo kale oo la xiriira hawlaha sahminta amase ka-shaqeynta macdanta.
3) Agaasimaha ama qofka uu isagu si qoraal ah ku soo igmado, wuxuu awood u leeyahay inuu fatasho dhammaan qorsheyaasha iyo dokumentiyada la xiriira hawlaha baarista amase ka-shaqeynta macdanta, inuu fatasho dhammaan godadka, kana soo qaado namuunno amase samballo, goor kasta oo uu daw bido.

**Qod. 82**
**Awoodda soo-dhexgalidda haddii qaababka shaqadu noqdaan kuwo halis ah, iwm**

1) Haddii Agaasimaha amase Sarkaalka caafimaadka uu la kulmo wax khatar ah amase wax cilladeysan oo waxyeello u geysanaya ladnaanta amase caafimaadka dadka iyo xoolahaba, kuwaasoo ku lug leh hawlaha baarista, ka-shaqeynta macdanta amase marinnada la maro,
wuxuu ogeysiis qoraal ah siinayaa qofka xaq ahaan ku qoran baarista amasa xaqa loo leeyahay marinnada maro amase wakiilkiisa u kormeera shaqooyinkaas.
2) Ogeysiiskaas kor lagu soo sheegay, waa in lagu qeexaa asbaabta loo arkay in sheygaas amase hawshaas ay yihiin kuwo khatar ah amase cilladeysan, lagana codsado in muddada ku cayiman ogeysiiskaas si deg deg ah wax looga qabto cilladdaas amase khatartaas.
3) Agaasimaha amase Sarkaalka caafimaadka, haddii uu arko, wuxuu awood u leeyahay inuu amro hakinta hawlaha tan iyo inta aan laga saarin meeshaas khatarta.
4) Qofka xaq ahaan ku qoran sahminta amase ka-shaqeynta macdanta amase marinnada amase Wakiilkiisa, kolka uu soo gaaro ogeysiiska waa inuu oofiyaa awaamirta ku qoran ogeysiiskaas, haddiise uu qaybo ka mid ah dood ka qabo waa inuu si qoraal ah ugu soo gudbiyaa Xoghayaha, kaasoo arrintaas dulucdeeda go'aan ka gaaraya.
5) Kolka qofka ku qoran xaqa sahminta amase ka-shaqeynta macdanta amase marinnada amase Wakiilkiisa uu dacwadiisa u soo gudbiyo Xoghayaha, si waafaqsan faqradda kore, waa inuu hakiyaa ka-shaqeynta godka macdanta amase qayb ka mid ah, amase isticmaalka makiinadda, qalabka rakiban, qalabka amase socodsiinta uu ogeysiisku ka hadlayo, waana inuu sida uu tilmaamay Sarkaalka, ka fogeeyo dhammaan dadka khatarta meeshaas taal, tan iyo inta khilaafka uu ka soo xallinayo Xoghayaha.

Intaas waxaa sii dheer, haddii Sarkaalka ogeysiiska bixiyay ay ula muuqato in aysan jirin khatar deg deg ah, in Sarkaalkaas uu oggolaan karo in shaqooyinkii sii socdaan tan iyo waqtiga daruuriga u ah oo laga xallinayo khilaafka dhashay, iyadoo raacayo xadeynta loo dejiyay iyo lshuruudaha lagama maarmaanka u ah badbaadada, isaguna uu arkay iney yihiin daruuri, kuwaasoo si qoraal ah lagu qeexi karo.

**Qod. 83**
**Habraaca lagu dhaqmayo kolka uu shil dhaco[4]**

1) Qofka mas'uulka ka ah la socodka hawlaha, waxaa waajib ku ah inuu sida ugu dhaqsida badan warbixin qoraal ugu gudbiyaa Agaasimaha (1) haddii, la xaqiijiyo shil dhacay oo la xiriira hawlaha sahminta amase ka-shaqeynta macdanta, kaasoo dhaawac culus amase geeri bani-aadan sababay. Agaasimaha waxaa looga baahan yahay inuu ku tallaabsado baaritaan la xiriira sababihii dhaliyay shilkaas, warbixinna ka diyaariyo dacwooyinkii la xiriiray oo laga soo gudbiyay.
2) Agaasimaha waxaa ku waajib ah inuu nuqul la xiriira warbixintaas ee qodobkani ka hadlayo inuu u soo gudbiyo Xafiiska ku shuqul leh ee hay'adda shaqada iyo shaqaalaha.
3) Iyadoo waafaqsan ujeeddooyinka baarista oo looga hadlayo qodobkan, Agaasimaha wuxuu leeyahay awood la siman tan Maxkamadaha marka la eego dhinaca u-yeerista markhaatiyada (183-184 Xeerka Habka Madaniga), amarka soo-bandhigidda buugag iyo dokumentiyo (151 X.H.M.) amase dhinacyada ay khuseyso inuu dhaaritaan marsiiyo (103; 171-175 X.H.M.).
4) Markhaatigaa ku yimaada codsiga Agaasimaha baaritaanka sameynaya, waxaa laga bixinayaa kharajyada macquulka ah ee ka soo baxay, sidaasoo kale si la mid ahna markhaatiyada looga yeeray Maxkamadda.
5) Qodobkan marka laga hadlayo, "Agaasime" waxaa loola jeedaa xitaa Sarkaal uu isaga soo magacaabay si waafaqsan ujeeddooyinika isla qodobkan.

**CINWAANKA 8AAD**
Diiwaangelinta

**Qod. 84**
**Waajibka diiwaangelinta ee xuquuqaha baarista amase ka-shaqeynta macdanta**

Waxaa waajib ah in laga diiwaangeliyo Xafiiska Agaasimaha dhammaan wixii oggolaasho, shatiyo amase ruqsado macdaneed iyo xuquuqaha la xiriira marinnada la maro, si waafaqsan qaababka loo dejiyay.

**Qod. 85**
**Waajibka diiwaangelinta ee wareejinta xuquuqaha**

1) Kol kasta oo loo wareejiyo amase loo hibeeyo qof kale oggolaasho, shati, ruqsad amase xaq la xiriira marin la maro (68), qofkaas waxaa ku waajib ah inuu arji uu ku weydiisanayo diiwaangelin u soo qorto Agaasimaha, isagoo waafajinaya habraaca loo dejiyay, muddo soddonka beri ee ku xiga

[4] Eeg qodobbada 4, Lr.18, 55, 55 ee Sharciga Lr.76 ee 7 Diseembar, 1972 – *Sharciga Caymiska Khasabka ah ee Shilalka Shaqada iyo Cudurrada ka Dhasaha* Mihnadaha (Lifaaqa 29).

ah wareejintaas amase muddo sodoon beri ah gudahood marka laga soo billaabo taariikhda oggolaashaha haddii loo baahdo.

2) Kolka uu dhasho, la cusbooneysiiyo amase uu dhammaado xaq ka soo jeeda oggolaasho, shati amase ruqsad macdaneed amase xaq marin la maro, waxaa ku waajib ah qofka daneynaya, isagoo raacaya qaabka habraaca loo dejiyay, inuu arji ku weydiisto Agaasimaha in loo diiwaangeliyo dokumenti sababay in la cusbooneysiiyo amase la joojiyo xaqaas, muddo soddon beri gudahood ah, marka laga soo billaabo kolkii la fuliyay.

Waxaa intaas sii dheer, in Agaasimaha, isagoo ku tallaabsanaya xaqa iyo sabab daw ah, wuxuu kordhin karaa muddada lagu diiwaangelin karo arjiga.

**Qod. 86**
**Diiwaangelintu ma daweyneyso haddi cillado jiraan**

Diiwaangelinta aan qumaneyn ma daweyneyso cilladaha ku jira dokumentiga la diiwaangeliyay, mana yeelaneyso saameyn sharci amase ansaxid uusan dokumentigaas heli laheyn.

**Qod. 87**
**Baaarista diiwaanka**

Agaasimaha kolka laga dalbado baarista diiwaanka, horena loo bixiyay mushaqaayadda nidaam ahaan waajibtay, wuxuu:

a) goor kasta oo macquul ah idmayaa baarista diiwaanka;
b) bixinayaa nuqullo amase xog ka soo jeedda dokumenti la xiriira diiwaangelin kasta.

**Qod. 88**
**Nuqullo dokumentiyada xuquuqaha baaritaan amase ka-shaqeyn macdaneed iwm oo loo gudbinayo Guddoomiyaha Degmada**

Agaasimaha wuxuu u gudbinaya Guddoomiyaha Degmada oo ay deegaankiisa khuseyso falalka kala ah nuqul dokumentiyo falal ku saabsan oggolaasho amase ruqsad macdaneed (oo ka duwan oggolaashaha baaritaaneed oo lagu bixiyay si waafaqsan Cinwaanka II) iyo xuquuq kasta oo kale oo marin la maro ah, weliba fal kasta oo kale oo lagu wareejinayo, lagu cusbooneysiinayo, kana dhalanaya amase joojinaya mid kasta oo ka mid xuquuqahaas, kuwaasoo ka diiwaangashan Xafiiskiisa.

**CINWAANKA 9AAD**
Khilaafaadyada

**Qod. 89**
**Weydiisasho baaris khilaafaadyo**

Kolka labo amase in ka badan oo qof oo leh xuquuqo baaris amase ka-shaqeyn macdaneed, uu ka dhex dhasho khilaaf ku saabsan arrin kasta oo la xiriirta qodobbada Xeerkan amase Nidaamka amase qodob ku saabsan oggolaasho amase ruqsad macdaneed amase arrin ka dhalatay hawlgallada baarista amase ka-shaqeynta macdaneed, sidaa awgeedna dhinacyadaas uu khilaafku ka dhaxeeyo waxay si wadajir ah u qoranayaan arji, si baariis loogu sameeyo.

**Qod. 90**
**Diyaarin xusuusqorid, caddeymo iwm**

1) Dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo waa iney u soo gudbiyaan Agaasimaha xusuusqorid ku saabsan arrinka la isku hayo.
2) Agaasimaha amase Sarkaal kale oo uu isagu soo igdmaday, wuxuu awood u leeyahay inuu sameeyo baaaritaan la xiriira khilaafka jira, sidaa awgeedna wuxuu leeyahay awoodaha baaritaaneed iyo faaqideed ee lagu qeexay Qod.83aad ee Xeerkan.

**Qod. 91**
**Xallinta xadadka khilaafku ka jiro**

1) Agaasimaha amase Sarkaal kale oo uu isagu soo igmaday, wuxuu baaritaan ku sameynayaa deegaanka, xadadka amase calaamadaha, kolka uu dhasho khilaaf, wuxuuna awood u leeyahay inuu wax-ka-beddeli karo, hadba sida uu isagu daw bido oo arrinkaas ku habboon.

**Qod. 92**
**Warbixinta khasabka ah ee Agaasimaha**

Kolku ay baaris kasta dhammaato, Agaasimaha amase Sarkaal kale oo uu soo igmaday, waa inuu warbixin ay la socoto talo-soo-jeedintiisa u soo gudbiyaa Xoghayaha, soona raaciyo khariidad muujineysa wax-ka-beddelladii uu sameeyay, si waafaqsan qodobka kore.

**Qod. 93**
**Awoodda Agaasimaha uu ku diidi karo baaris sameynta**

Iyadoo aan wax laga beddeleyn waxyaabaha ku cad Cinwaankan, Agaasimaha wuuu diidi karaa inuu sameeyo baaris la xiriirta khilaafaadyo, kolka uu diidmadaas ku tallaabsanayo amase goor kasta oo uu baaritaan socdana wuxuu dhinacyada khilaafaafku ka dhexeeyo u gudbin karaa Hay'adda Garsoorka (1).

**CINWAANKA 10AAD**
Waxyaabo Kala Duwan, Awaamir Ciqabeed Iyo Gunaanad

**Qaybta 1aad**
Waxyaabo Kala Duwan

**Qod. 94**
**Macaadiin la helay**

1) Kolka qof leh xaq baaritaan ka-shaqeyn macdaneed uu helo macaadiin ay la tahay iney leeyihiin qiime dhaqaale amase qiime yeelan kara, horena aan loogu aqoon deegaankaas, waxaa ku waajib ah inuu ogeysiiyo Xoghayaha, isagoo si qeexan ugu kala faahfaahinaya, waana inuu gaarsiiyaa namuunnada amase samballada macaadintaas.
2) Haddiise Sarkaal dawladeed uu helo macaadiin ay ula muuqato iney leeyihiin qiime dhaqaale amase qiime yeelan kara, wuxuu awood u leeyahay inuu calamadeeyo xadadka goobtaas oo aan ka

weyneyn hal mayl oo laba jibbaaran amase goobo badan oo isugeyntoodu baaxaddaas le'egtahay, wuxuuna warbixin ku saabsan xadeyntaas oo ay la socoto khariidad goobtaas la calaamadeeyay, u soo gudbinayaa Xoghayaha isagoona xitaa soo raacinaya namuunnada amase samballada macaadiinta la helay.

Calaamadeyntaas kolka la sameynayo waa in la raaco, isla qaabka loo raaco oggolaasho ka-shaqeyn macdaneed. Goobtaas la calaamadeeyay waxaa lagu sifeynayaa "Goob Macdaneed oo Dawladeed".

## Qod. 95
## Kala-horreysiinta araajida

Haddii labo in ka badan oo qof ay soo gudbistaan arji ay ku codsanayaan oggolaasho amase ruqsad macdaneed oo la xiriira isla goob amase goobo kala korreeya, kolkaas Xoghayaha wuxuu mudnaanta koowaad siinayaa sida ay araajida u soo kala horreeyeen, waxaana shardi ah in la soo waafajiyay nidaamkii loo dejiyay, goobtaasina tahay mid si caadi ah loo calaamadeeyay xadadkeeda, sida ku qeexan Xeerkan amase Nidaamka.

## Qod. 96
## Wasakheynta biyaha dan guud

Waxaa qof kasta ka reebban inuu ku wasakheeyo maadddooyin halis ah amase sun ah biyaha dan guud loo leeyahay iyo inuu ku shubo ciid, dhiiqo amase qashin kale oo tuuris ah, kuwaasoo xannibaya amase hor-istaagaya in la isticmaalo biyahaas.

## Qod. 97
## Calaamadeynta dhinacyada xadadka

1) Calaamadeynta lagu sameynayo dhinacyada xadadka goobta oggolaasho amase ruqsad macdaneed lagu bixiyay, waxaa dhinacyada ay goobtaas la soo sheegay ka kooban tahay laga dhisayaa calaamado taag taagan.
2) Calaamadeynta dhinacyada ee baaxadda goobta la degganyhay amase la kireeyay, lagama maarmaanna u ah hawlgallada baarista amase ka-shaqeynta macdaneed, waxaa laga soo yareyn karaa baaxadda aagga, sida ku cad oggolaashaha amase ruqsadda, goor kastana wey is-beddeli karaan sababo la xiriira baahi jirta ee hawlgallada macdaneed.

## Qod. 98
## Isticmaalka waddooyinka macdanta iwm

1) Qofka ku qoran ruqsadda oo dariiq ka dhex dhista baaxadda dhuleed ee oggolaashaha ama ruqsadda macdanta lagu siiyay amase si waafaqsan xaqa marinnada la maro (15-16), xaq uma laha inuu ka hor-istaago dhulkaas qof dan xaq sharci ah u leh goobta ay waddadaas ka dhisan tahay amase Sarkaaal dawladdeed oo uu waajib ahaan soo igmaday Xoghayaha, si uu u galo una isticmaalo.

   Laakiinse:
   a) haddii, sida ay ula muuqato qofka ruqsadda dhulkaas ku qoran uu u arko in qofkaas isticmaalaya uu waxyeello weyn u geysanaya amase uu kharashka dayactirka waddadaas uu ku siyaadinayo, kolkaas qofka ku qoran ruqsadda dhulkaas wuxuu xaq u leeyahay inuu qofkaas waddada isticmaalaya uu ka qayb qaato kharashkeeda dayactirka;

b) qofka ku qoran ruqsadda dhulka wuxuu awood u leeyahay inuu amro qofkii si toos ah u uga xannibo inuu si xor ah u isticmaalo amase ugu intifaaco waddadaas inuu ka xaddido isticmaalka waddadaas, si faragelintiisa loo joojiyo.

2) Marka laga reebo sida lagu sheegay qodobka kore, waddada uu dhisay qofka ku qoran oggolaashaha amase ruqsadda macdanta amase leh xaqa marinnada la maro, waddada uu dhistay qofka ku qoran oggolaashaha amase ruqsadda macdaneed, waxaa loo aqoonsanyahay waddo gaar loo leeyahay sidaa awgeedna dadweynuhu ma isticmaali karo haddii aan ruqsad laga haysan amase aan loo hoggaansamin shuruudaha u degsan qofkaas ku qoran.

3) Garoonka diyaaradaha ay ku soo degaan oo uu dhistay qofka iska leh xuquuqaha baarista amase ka-shaqeynta macdanta marka laga reebo xaaladaha deg degga ah, waxaa loo aqoonsanyahay garoon diyaaradeed oo gaar loo leeyahay, mana ay isticmaali karaan diyaarado kale iyadoo aan oggolaasho laga haysan qofkaas ku qoran, loona hoggaansamayo shuruucda kolkaas jirta oo nidaamiya garoonnada gaarka loo leeyahay oo diyaaraduhu ku soo degaan iyo guud ahaan duulista hawada dhuka Jamhuuuriyadda.

**Qod. 99**
**Xaalad dagaal**

Kolka la nidaaminayo xaalad dagaal oo lagu dhawaaqay, Xoghayaha wuxuu xaqa mudnaanta khaaska uu ku leeyahay dhammaan macaadiinta lagu soo saaray oggolaashaha amase ruqsadda macdanta iyo dhammaan wixii kaloo macaadiinta ka soo baxa; wuxuu kaloo xaq u leeyahay inuu la wareego la-socodka dhammaan hawlaha ka-shaqeynta macdanta oo uu fuliyay qofkaas ku qoran oggolaashaha amase ruqsadda, tan iyo inta ay socoto xaaladda dagaal ee lagu dhawaaqay.

**Qod. 100**
**Waxaa reebban in la farageliyo xuquuqaha baarista amase ka-shaqeynta macdanta, xuquuqaha marinnada la sii maro, calaamadaha, alwaaxda, iwm**

Waxaa goor kasta qof kasta ka reebban inuu:

a) hor-istaago amase xannibo hawlaha baarista amase ka-shaqeynta macdanta oo lagu soo oggolaaday si waafaqsan Xeerkan amase Nidaamka;
b) hor-istaago ku-dhaqanka xaqa waddo marista;
c) inuu abuuro xannibaad ku timaadda makiinadaha, qalabka dhulka ku rakiban, dhismayaasha amase hanti kale oo dhextaal dhulka oggolaashaha amase ruqsadda macdanta lagu baxshay amase xaqa m arinnada la maro;
d) isagoo aan oggolaasho sharci ah u haysan, inuu burburiyo, tirtiro amase si ula-kac ah uu u cusbooneysiiyo calaamadihii xadadka kala sheegayay, calaamadaha, rukummada taagan, boorar amase ogeysiisyo loo taagay ujeeddooyin la xiriira Xeerkan amase Nidaamka;
e) in iyadoon raalli laga aheyn la farageliyo, waxyaabaha ku saabsan alwaaxda, tiirarka taagan, albaabbada amase oodafooyinka loo isticmaalo difaaca xeyndaabka macdanta, ceelka amase god dhulka hoose laga dhiso oo la maro;
f) in iyadoo uusan raalli ka aheyn qofka sharci ahaan ku qoran in la cusbooneysiiyo amase la farageliyo haraaga ka soo hara qashinka qubista ah;
g) in la horistaago qof kasta oo gudanaya xuquuqda uu siinayo Xeerkan amase Nidaamka.

**Qaybta 2aad**
Ganaax ciqaabeed

**Qod. 101**
**Baarista amase ka-shaqeynta macdanta sharcidarrada ah**

Qof kasta oo ka fulinaya hawl baaris amase ka-shaqeyn macdaneed goobaha lagu soo sheegay Qod. 2aad si ka duwan qodobbada Xeerkan amase Nidaamka waxaa lagu qaadayaa dembi ciqaabtiisu tahay ganaax gaaraya Sh.So. 100,000 amase xarig gaaraya ilaa iyo laba iyo toban bilood amase labadaba ciqaaboodba la isu raaciyo.

**Qod. 102**
**U-hoggaansanaan-la'aanta digniinaha**

1) Haddii qofka ku qoran xaq baaritaaneed amase ka-shaqeyn macdaneed amase xaq marin la maro, amase wakiilkiisa, uu ka gaabsado inuu u hoggaansami waayo dalabaadka ku qoran digniinta amniga ee la siiyo sida ku cad Qod. 82aad amase uu ka soo bixi waayo inuu u hoggaansamo go'aanka Xoghayaha uu ka soo saaro dacwadiisa, waxaa lagu qaadayaa dembi ciqaabtiisu tahay ganaax gaaraya Sh.So. 20,000 amase xarig gaaraya ilaa iyo laba iyo toban bilood, amase labada ciqaaboodba la isu raaciyo.
2) Qof kasta oo aan u hoggaansamin dalabaadka ku qoran digniinta amniga oo si sharciga Xeerkan amase Nidaamka waafaqsan loo siiyay, waxaa lagu qadayaa dembi ciqaabtiisu tahay ganaax gaaraya Sh.So. 5,000 amase xarig gaaraya ilaa iyo saddex bilood, amase labada ciqaaboodba la isu raaciyo.

**Qod. 103**
**Imaasho-la'aanta baaritaanka la isugu yeero**

Qof kasta oo ka gaabsada inuu sameeyo, diida inuu ka jawaabo su'aalo uu u soo jeediyay amase uu la ogyahay Agaasimaha amase Sarkaal kale oo idiman, kuwaasoo wada baaris, haddii loo yeero oo uu imaan waayo amase uu keeni waayo buugag amase dokumenti baaritaan lagu fulinayo, sida waafaqsan Qod. 83aad waxaa lagu qaadayaa dembi ay ciqaabtiisu tahay gaanaax gaaraya Sh.So.400.

**Qod. 104**
**Ganaaxa guud**

Qof kasta oo lagu helo inuu galay gaf la xiriira Xeerkan amase Nidaamka, xadgudubkaasoo aan si cad loo sheegin ciqaabtiisa (53, 72-73), waxaa lagu ganaaaxayaa ilaa iyo Sh.So.10,000 amase xarig gaaraya ilaa lix bilood, amase labadaas ciqaabood la isugu daro.

**Qod. 105**
**Macdanta iwm oo ay maxkamaddu la wareegto**

1) Marka lagu daro ciqaab kasta oo kale, Hay'adda Garsoorka (1) waxay awoodda iney la wareegto dhammaan macaadiinta lagu soo saaray tan iyo intii lagu guda jiray baarista iyo ka-shaqeynta sharci-darrrada ah ee macdanta amase lagu helay iyadoo lagu xadgudbay qodobbada Xeerkan

amase Nidaamka, amase, marka laga reebo macdantaas la soo sheegay, in la bixiyo lacag cadadkeeda ay Hay'adda Garsoorka soo xaddiddo qiimaha ay macdantaasi u dhigmaan (53, 72-73).

2) Hay'adda Garsoorka waxay sidoo kale amri kartaa la-wareegidda qalabka iyo makiinadaha loo isticmaalay baarista iyo ka-shaqeynta macdanta sharci-darrada ah.

**Qaybta 3aad**

Awaamirta ugu dambeysa

**Qod. 106**
**Qodobbo wax nidaaminaya**[5]

1) Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, kaddib markuu dhageysto soo-jeedinta Xoghayaha, wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro qodobbo lagu nidaaminayo fulinta Xeerkan.
2) Marka laga reebo awoodaha guud ahaaneed oo lagu xilsaaray faqradda koowaad, qodobbada wax nidaaminaya waxay go'aamin karaan:
   a) habraaca codsiga, qaabka iyo shuruudaha loo marayo cusbooneysiinta, wareejinta, tanaasulidda, kala-laabshada iyo diiwaangelinta dhammaan xuquuqaha lagu kasbaday oggolaasho ama ruqsado macdaneed oo la dhiibay;
   b) khidmadaha iyo ijaarka la bixinayo, dhigaallada lagu bixinayo oggolaasho amase ruqsado macdaneed oo la dhiibay amase cusbooneysiintooda, wareejintooda, tanaasuliddooda amase kala-laabashadooda amase sameynta dan iyaga la xiriirta;
   c) baaxadda, qaabka iyo habraaca loo sameeyo xadeyntaa amase kormeerka baaxadda dhuleed oo lagu tilmaamay oggolaashaha amase ruqsadda macdaneed iyo weliba fujinta calaamadaha aan loo baahneyn;
   d) dhismaha iyo isticmaalka marinnada la maro (15);
   e) jaridda iyo isticmaalka alwaaxda looga danleeyahay hawlgallada baarista amase ka-shaqeynta macdanta;
   f) shuruudaha amniga u degsan, ladnaanta, caafimaadka iyo guriyeynta shaqaalaha ku hawlan hawlgallada baarista amase ka-shaqeynta macdanta iyo weliba tallaabooyinka ka-hortagga ah oo lagama maarmaanka u ah in hawlgallada loo guto si amni, caafimaad iyo wax-ku-ool ah (80-83);
   g) isticmaalka, maqaasiingelinta xaaladaha amniga la xiriira iyo habsami-u-maareynta qaraxyada loo isticmaalo baarista iyo ka-shaqeynta macdanta;
   h) xadeynta amase inaan loo isticmaalin wiilaasha, dhallinyarada iyo dumarka shaqooyinka macdanta ee dhulka hoostiisa laga fuliyo;
   i) haysashada, keydinta, raridda, badbaadinta, diyaarsanaanta iyo ganacsiga waxyaabaha macdanta ka soo jeeda (76-79);
   j) diiwaangelinta oggolaashaha iyo ruqsaddaha macdanta, xuquuqaha marinnada la maro iyo diiiwaangelinta dokumentiyada wax lagu wareejiyo iyagoo lala kaashanayo xuquuqahaas iyo danahaas, haddii iyagaas laga tanaasulayo amase la nidaaminayo iyo weliba khidmadaha ku waajibay in lagu bixiyo diiwaangelinta;
   k) wakiillada iyo ergada la magacaabayo, xisaab-celinnada, warbixinnada iyo qorshayaasha la fulinayo, nooca diiwaangelinnada, lambarrada xisaabaadka lacagta maamulkeeda loo furay, buugaagta, qorsheyaasha gaarka u ah dadka ku qoran xuquuqaha baarista iyo ka-shaqeynta

[5] Eeg Decreto P.C.R.S., n.173 del 3 aprile, 1971 – Regolamento Minerario (B.U. Suppl.n.2 al n.7 del 18 luglio, 1971).

macdanta iyo xogta looga baahan yahay iney soo gudbiyaan dadka ku qoran xuquuqahaas, kolka ay sidaas ka dalbadaan Hay'adda ku shuqul leh (5, 78-79);

l) haftooyinka saamiyada la siinayo Dawladda, habraaca loo xisaabinayo xadka ay le'egyihiin saamiyadaas, nooca iyo waqtiga la bixinayo (71-73);

m) baabi'inta waxyaabaha sunta ah amase halista ah, amase ah haraa qashin la tuurayo, kuwaasoo ka soo jeeda hawlgallada macdanta la xiriira;

n) waajibaadyada shaqo oo ku saabsan oggolaasho amase ruqso macdaneed iyo is-raacinta waajibaadyada shaqo oo ka soo jeeda labo amase in ka badan oggolaasho amase ruqsado macdaneed oo dhammaantood uu isla leeyahay hal qof.

**Qod. 107**
**Burinta iyo waxyaabaha reebban**

1) Iyadoo aan waxba loo dhibeyn xuquuqaha haatan jira ee baarista amase ka-shaqeynta macdanta oo lagu baxshay iyadoo saldhig looga dhigay heshiis amase nooc kale oo oggolaasho amase ruqsad macdaneed iyo iyadoo aan waxba loo dhimeyn mas'uuliyado kale oo kuwaas aan soo sheegnay dartood lagu galay, waxaa la buriyay shuruucda soo socota:
   a) Amarbxinta macdanta "Ordinanza Mineraria n. 13 ee 15 Agoosto 1951 oo looga dhaqmayay Gobollada Koofur ee Jamhuuriyadda);
   b) Amarbixinta macdanta ee batroolka "Ordinanza Mineraria sul Petrolio (Cap.124. Vol II, Leggi del Somaliland, 1950), oo looga dhaqmayay Gobollada Woqooyi ee Jamhuuriyadda);
   c) Amarbixinta la xiriirta in la hubiyo ka-faa'iideysiga macdanta dhulka korkiisa, "Ordinanza sul Controllo degli Sfruttamenti a cielo aperto (2) n. 15 del 1951 oo looga dhaqmayay Gobollada Woqooyi ee Jamhuuriyadda);
   d) Amarbixinta macadaneed "Ordinanza Mineraria" n. 18 ee 1953 oo looga dhaqmayay Gobollada Woqooyi ee Jamhuuriyadda).
2) Waxaa sidoo kale la buriyay sharci kasta oo kale amase awaamir sharci ee la xiriira baarista amase ka-shaqeynta macdanta oo ka soo horjeeda amase aan la socon karin awaamirta Xeerkan.

**Qod. 108**
**Sarreynta qoraalka afka ingiriiska**

Kolka uu khilaaf ka dhasho qoraalka afka ingiriiska iyo kan talyaaniga ee Xeerkan amase Nidaamka waxaa mudnaanta la siinayaa oo la raacayaa qoraalk afka ingiriiska.